


Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)

Hab-xukunku Degaan ee Habboon iyo Barnaamijka
Tababarka Hoggaamineed

DHISIDDA AWOODDA

URURRADA AAN XUKUUMIGA
AHAYN IYO KUWA BULSHADA KU SALAYSAN
EE FIDI TAANKA URUR AHAANEED



QAYBTA 2aad

QALABKA NAQSHADEYNTA MAARAYNTA
IYO TABABARRADA



UN-HABITAT



European Commission

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA
AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA
BULSHADA KU SALAYSAN**

EE

FIDITAANKA URUR AHAANEED

**QAYBTA 2aad
QALABKA NAQSHADEYNTA
MAARAYNTA IYO TABABARRADA**

SHAXDA TUSMADA BUUG-HAWLEEDKA

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU
SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

AQOONSI	3
GOGOL-DHIGA BUUGGA	4
HORDHAC	6
QALABKA 1:	
Hor-dhaca Dhisidda Haya'adaha iyo awooda Ururrada Aan Xukuumi ahayn iyo Ururro Bulsho ku Sal-leh	8
Lifaaqa 1: Hordhac kooban ee qisada	
Laakiin ha ka waaban inaad abuurato mid aad adigu leedahay	11
Lifaaqa 2: Liisaska loosoo jeediyey ee noocyada ururrada in lagu darsato Layliga Dhisida is-bahaysiyo	12
QALABKA 2:	
Abuuridda Qorshe Istaraateji ah ee fidinta war-is-gaadhsiinta	13
Lifaaqa 1: Qorshe Istaraatejiyadeed ee lagula xidhiidhaya xudduudaha dibada	16
QALABKA 3:	
Horumarinta Xirfadaha dhegeysi firfircoon ee wax-ku-oolka ah	26
Lifaaqa 1: Caress-ingka jidkaaga dhegeysi firfircoon oo wax-ku-oola	28
Lifaaqa 2: Qofka u goob-joogaaya sheekaysiga inta uu socdo layliga dhegeysiga firfircoon	30
Lifaaqa 2b: Oo loogu talagalay sheekada qofka jeedinaya ee qiimaydoona waxku oolnimada Firfircoon	33
Lifaaqa 2t: Oo loogu talagalay Qofka doorka dhegeystaha firfircoon si uu qiimayn Uga sameeyo wax-qabadkiisa/keeda ku saabsan doorkan	34
QALABKA 4:	
Isqiimayn hab-dhaqanka shebekad-xidhiidhinta	35
Lifaaqa 1: Shebekad-xidhiidhinta: qiimaynta hannaannada qofeed iyo kuwa urureed	36
QALABKA 5:	
Dib-u-eegida tii u fiicanyd iyo tii u xumayd waqtiyadii shebekad-xidhiidhinta	42
QALABKA 6:	
Dhisidda is-bahaysiyadda istaraatejiyad ku dhisan	43
QALABKA 6A	44
QALABKA 6b	45
Lifaaqa 1: Daraasad xaaladeed: dhisida Is-bahaysiyo silo badbaadiyo kooxda qashun qadhaabadka	46
QALABKA 7:	
Qiimaynta shuraakayaasha manta	48
Lifaaqa 1: Farsamo-qiimayneedda sifaha shuraakanimo	50
Lifaaqa 2: Qorshaynta horumaridda shuraakoobid midho dhala	52
QALABKA 8:	
Ku hawl-galka dhinaca awoodda ee dad-kasbashada	54
Lifaaqa 1: Odorska istaraatejiyaddaha dad-kasbashada shakhsi	56
Lifaaqa 2: Tilmaamaha adeegsadhaha ee illaha awoodda iyo kasbashda dad	60
QALABKA 9:	
Badmaaxida saaxadda siyaasadeed	61
QALABKA 10:	
Ololayntu waa xirfad dad-kasbasho	63
QALABKA 11:	
Daba-gelidda iyo qiimaynta fiditaanka ururka	64
Lifaaqa 1: Dedaalka Fiditaan ee Ururkiinna Baadhitaan dayactir joogto ah aad ugu samaynayso	65
EREY-BIXIN	71

AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee “***dhisidda awoodda ururrada aan xukuumiga ahayn iyo kuwa bulshada ku salaysan ee fiditaanka urur ahaaneed***” waxay ku hirgashay Barnaamijka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay Komishanka Yurub (EC), isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda af Soomaaliga ah ee buugan waxa ka hawl-galay Mr. Ciise Axmad Nuur. Waxa dib u habayn ku sameeyay Mr. Mohamed Farah Warsame (Gafote) oo tifaf-tirka ku xeel dheer Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimaha Aadamaha (UN-HABITAT) laanta Hargeysa ku taal ayaa gacan ka gaysatay hirgelinta hawshan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhistada iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

This manual is part of a series that was published by the UN-HABITAT Training and Capacity Building Branch (TCBB) for ‘capacity building of NGOs and CBOs’ and ‘Building Bridges between local governments and citizens’. As part of the ‘Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)’, these manuals were translated into Somali and adapted to the Somali context. The GLTP was funded by the European Commission and implemented by UN-HABITAT under the Regional Office for Africa and Arab States (ROAAS) between July 2003 and June 2005. More information on this project can be found at www.unhabitat.org/roaas.

GOGOL-DHIG

Silsiladdan oo ah buug-hawleedyo tababar, oo loogu talagalay, dhismaha awoodda ururrada aan dawliga ahayn, ayaa waxa loogu talagalay in kor loogu qaado maaraynta guud ahaaneed iyo waxtarkooda dhinaca shaqada. Silsiladdani waxa ay ku soo hagaagtay dib-u-habaynta iyo kor u qaadista Xarunta Ummadaha Midoobay ee Deegaamada Adamaha oo laga dhigay barnaamij dhamaystiran oo isla markiina loo yaqaano barnaamijka Ummadaha Midoobey ee deegaamada kaasi oo isla markiina loo bixiyay UN-HABITAT, dib-u-habaynta iyo dib-u-magacaabistana uu ku dhawaaqay Golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobey fadhigoodii 56^{naad} ee bishii Diisambar sannadkii 2001. Ururrada aan dawliga ahayn natiijada ka dhalatay dib-u-abuurista iyo bedelaada lagu sameeyay, hay'adda UN HABITAT ama Hay'adda Deegaanka ee Ummadaha Midoobay, ayaa waxa ay tahay in ay fursad u hesho inay ka caawiso dawladaha iyo lammaanayaasha sidii ay u fulin lahaayeen ajendaha ama Barnaamijka UN HABITAT. Barnaamijkaasi oo Golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobay uu ku baaqay sannadkii 1996, shir weynihii Istanbul, Turkiga baaqaasi oo Golaha loo dhan yahay uu cusboonaysiiyay shirweynihii loo bixiyay Istaambul +5 oo qabsoomay bishii June sannadkii 2001. Ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada ku salaysan, ayaa waxa u taala in ay ciyaaraan kaalin muhim ah sidii loo gaadhi lahaa ujeedada kama dambaysta ah ee uu leeyahay barnaamijka UN HABITAT, taasi oo ah in loo helo dhammaan dadka dunida deegaan nolol fiican leh.

Daabacaadda buug-hawleedyadan ayaa waxa kale oo uu ku soo hagaagay awood-dhisida ee hay'adda deegaanka ee UN-HABITAT. Taasina waxa ay tusaalaynaysaa aqoonsiga aanu aqoonsanahay muhiimadda uu leeyahay dhismaha Awoodda Ururrada, iyada oo noqon karta qalabka loogu hawlgalayo sidii loo gaadhi lahaa ujeedada sare ama yoolka hay'addan ee ah in sannadka 2020 lagu sameeyo hagaajin la taaban karo noloshu 100 millyan oo qof oo ku nool deegaamada isku raranta ah, taasina waa sida lagu cadeeyay baaqa kun-sannadeedka ee hay'adda (Millennium Declaration).

Waxa jira cadaymo isa soo taraya oo muujinaya aqoonsi laysku raacsan yahay oo ku saabsan qiyamka qeexidoona barnaamijka magaalooyinka ee kun-sannadeedka cusub. qiyamkaasi waxa ka mid ah ka-qaybgalin (inclusion). Bulshooyinka raba inay hoggaanka hore kaga jiraan isbedelka xagga bulshada iyo xagga dhaqaalaha waa inay aqoonsadaan muhiimadda ay leedahay ka-qeybgelintu, laga qaybgeliyo dadka go'aamada sameeya tayada noloshooda iyada oo aan loo eegin hanti, rag ama dumar, da', isir ama diin.

Qiyamkan labaad ee la aqoonsanayaa waa hoggaanka la wadaago kuwaasi oo ka kala imanaya qaybaha kala duduwan ee bulshada iyo hay'adaha. Tan macnaheedu waxa weeye in loo arko ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada ku salaysan qaar waxqaban kara iyo lammaanayaal qiimo leh oo ka qaybgeli kara hoggaanka iyo masuuliyadaha buugg-hawleedyada loo bixiyey dhismaha biriishyada (building bridges), oo ay daabacdo hay'adda UN HABITAT, Waxa loogu talagalay inay la tacaalaan maaraynta loo wada jiro ee hawlaha iyo maaraynta colaadaha iyo khilaafyada kuwaasi oo ay u wadajiraan qabashadooda dadweynaha iyo ururrada aan macaash-raadiska ahayn ee bulshada.

Aqoonsiga saddexaad waxa weeye in kor loo qaado kartida urur-ahaaneed ee ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada ku salaysan bulshada, kartidaasi oo ah aqoon, xirfado, waayo aragnimo iyo adkaysi, kuwaasi oo marka laysku geeyo adkeeya awoodooda maaraynta maaliyadeed iyo agabkooda aadamiga ah iyo kartida ay u leeyihiin inay ururro kale la xidhiidhaan lana shaqeeyaan.

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU
SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

Haddaba si ay u noqdaan lammanayaal adag oo waxtar leh, ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada ku salaysan bulshadu waa inay muujiyaan in arrimahooda guduhu ay nidaamsan yihiin.

Buug hawleedyadan, oo ah silsilad qalab lagu fuliyo waxbarasho waxa iska kaashaday soo saaristooda, hay'addaha UN HABITAT iyo ururka loo yaqaan Partners Romania Foundation for Local Development, taasi oo maalgelinta lagu fulinayayna ay ka timid dawladda Netherlands iyo machadka Open Society Institute. Intaasi waxa dheer, dad badan oo kale oo ka qayb qaatay soo saarista silsiladan, waxaana ka mid ah:

1. Kooxo ururrada aan dawliga ahayn (NGOs iyo ururuada bushlo ku salaysan (CBOs) iyo hoggaamiyeyaal dawladaha hoose oo ka yimid Afrika koonfurta saxaaraha oo go'aan adagna wata ayaa isku yimid si ay u qeexaan baahidooda dhinaca waxbarashada. Waxana ay kulmeen aqoon is-weydaarsi ay qabanqaabisay hay'adda UN-HABITAT oo ku saabsanaa istaraatejiyada dhismaha awoodda, oo lagu qabtay magaalada Nakuru ee dalka Kiiniya bishii Noofember, 1998, kuwaasi oo qayb firfircoon ka qaatay diyaarinta qoraalkii kama dambaysta ahaa. Kulamadanina waxa ay ku gebogaboodeen aqoon is-weydaarsi ka dhacay magaalada Neyeri ee dalka Kiiniya sannadkii 2001.
2. Waxa iyana ka qaybgalay tijaabada qoraalada iyo qalabka tababarka loo diyaarshay shabakad hay'ado ah iyo tababarayaal ah oo ka wakiil ah barnaamijka gobol-ahaaneed ee dhismaha awoodda, isxukunka iyo hoggaaminta maxaliga ee dalalka Yurubta Bari iyo Yurubta Dhexe.

Ugu dambaystii waxa aan jecelahay in aan u mahadnaqo Mr. Fred Fisher oo qoraaga buug-hawleedkan oo isla markiina ah qoraaga guud ee taxanaha buugaga ah iyo kooxda khubarada oo aad u heer sareeya ee la qoray buugaagta. Waxa kale oo aan mahadnaq u celinayaa kooxda khubarada ah ee uu ka madaxda yahay Tomasz Sudra, kuwaasi oo iyaguna isu geeyay khibradooda si ay u dhamaystiraan qoraaladii qabyada ahaa iyo wax soo saarkii kale. Waxa kale oo iyaguna xusid mudan kooxda Romania ee ka socda ururka (partners Romania Foundation for Local Development) ee ay madaxda ka tahay Ana Vasilache oo iyaguna ka mas'uul ahaa qaabka loo dhiganayo buug-hawleedyada iyo nidaamka loo dejinayo qoraalkooda kama dambaysta ah.

Anna Kajumulo Tibaijuka
Under Secretary General and Executive Director (UN-HABITAT)

HORDHAC

Adeegyada soo socda waxa loo naqshadeeyey inay fikrado siiyaan laba heer oo dhegeysteyaal kala duwan ah. Qaybta hore waa afraadda jeclaan doonta inay sameeyaan noocyo kala duwan oo khibrad tababarro ah si ay dadka kale uga caawiyaan sidii ay u baran lahaayeen wax ku saabsan dhisidda awoodda fiditaanka urur. Maareeyeyaasha iyo Hor-joogeyaasha Ururro aan Xukuumiga ahayn iyo kuwa Ururro Bulsho ku Salaysan ee doonaya inay sii hagaajiyaan nidaamyada fiditaanka ururradooda iyo wax-qabadyadooda ayaa ah qaybta labaad dhegeysteyaasha loogu tala-galay. Qaybtan labaad waxay haystaan ugu yaraan laba dariiqo. Waxa laga yaabaa inay doonaan inay u maraan layliyada qaarkood keliya si ay ugu shaqeeyaan kordhinta aqoonta iyo xirfadahooda ku wajahan meelo ay gaar u danaynayaan ama khuseeya. Amaba waxa laga yaabaa inay u adeegsadaan layli koox maarayneed si ay u dhaliyaan fikir iyo wax qabad ku saabsan siday hadda u maareeyaan cilaaqaad-yada muhiimka ah ee ka baxsan xuduudaha ururkooda.

Waxaanay idinku dhiirri-gelinaynaa inaad adeegyadan u isticmaashaan dariiqo kasta oo ay u noqonayaan wax-ku-ool inay daboolaan baahidaada qof ahaaneed, baahiyaha tababarteyaashiinna, ama kuwa ururkiinna. Ha ka walaacin inaad wax abuure ku noqoto dabbagiddaada. Haddii ay tahay door jile ahaaneed, laga yaabaa inaad doontid inaad dib u min-guurisid si ay si habboon u muujin karaan sawirka xaaladdiinna dhabta ah. Haddii ay tahay hab-socodka qorshayn hawleed, beddeli si ay u waafaqdo baahiyaha khaaska ah ee ka qayb-galeyaashiinna. Haddii ay yihiin tilmaamuhu wax aad u adag, waa ducfi dhuuxa kaga jira kuwii curiya buug hawleedyadan, ka dhiga wax fudud ama dib ugu naqshadeeya iyaga hab ay idiin anfici karaan idinka iyo dhegeysteyaashiinna.

MUUNADAHA QALAB-ADEEGGA

Waxay kuu noqon doonaan wax kugu caawiya inaad waxyar ka ogaato naqshadda ay u isticmaalney dhisidda adeegyadan. Waxaynu u qaadanaynaa in badi kuwa isticmaali doonaa ay leeyihiin khibrad tababare. Taa awgeed, tilmaamuhu aad uma faahfaahsana sida laga yaabo inaad ka hesho buug hawleedyo la mid ah.

Ujeedada tababariddu waxa loo duubay himilooyin barasho ahaan, oo ah doorrin shakhsiyeed sida muuqata. Waxa raacda, laga yaabaa inay u qoreen si ka yara duwan wixii lagu soo baray ee ku saabsanaa ujeedada qoraalka, ama sida aad ficliyan aad u wax qorto marka aad naqshadaynayso dhacdo tababar. Dhinaca aynu ka eegno marka laga joogsado, waxaannu kugu dukhuulaynaa inaad qoraal waaqici ah u samayso si kasta oo sida ugu wanaagsan idiinku shaqaysa idinka iyo ka qayb-galeyaashiinna. Dariiqada aan isticmaallaa waxay ku salaysan tahay waxa annu is-leenahay waa la qaban karayaa fadhi tababar dhexdiisa. Marka si kale loo dhigo, in laga korodhsado aqoon, horumarinta xirfadaha, wax-ka-beddelka aammiinadaha, ama inay kasoo dhashaan wax-qabasho nooc uun ah, sida curinta qorshe hawleed.

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU
SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

Baahiyaha waqti ee aan halkan ku bixinaynaa waa wax ku dhisan haloosi qiyaaseedka u roon. Beddel si ay u waafaqaan baahidiina iyo waaya-aragnimadiinna sida loo sameeyo munaasabadaha barashada bilkeydka/tijaabada ah. Ugu dambayntii waaxyaha geeddi-socodku waxay sharxaan sidii aad u isticmaali lahayd adeegga si aad u gaadhid ujeedadaada (ooyinkaaga) barashada.

Tibaax hoga-tusmeed ah oo kale waa markaad u dhacdo obocda adeeggan. Nidaamka loo soo qaddimey adeegga maaha mid isugu xig-xiga sidii aad rabi lahayd inaad u isticmaasho marka aad dejinayso tababar aqoon-isweydaarsi. Mana aha wax u naqshadaysan sidii loogu wada isticmaali lahaa isla aqoon-isweydaarsi qudha. Taasi waxay noqon doontaa ciqaab naxariis-darro oo aan xukun sharciyeed ridin.

Sidii aynu ugusoo sheegnay bilawgii buug-hawleedkan, waxaannu jecellahay inaanu ka fikirno sidii ugu hawl-galeysaan maaraynta alaabtaa safar sahamin ahaan. Waxyaabo kale dhexdood, taasi micnaheedu yahay inaad laga baxo jidka weyn ee aynu kusoo samaynay sahamintiisa dariiqyo yaryar. Dhacdooyinka qaar way dhici kartaa inaad doontid inaad adeegga ku isticmaasho si aad dariiqaaga u jeexato. Wax kasta oo aad yeeshid, ugu waqti qaata, si idinka iyo asxaabtiinna safarka idinku wehelisa aad uga mabsuudi lahaydeen safarka sahaminta.

QALABKA 1: HORDHAC DHISIDDA HAY'ADAHA IYO AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA KU SALAYSAN

Layligan waxa loo dejiyey inuu hor-dhac u noqdo noocyada faraha badan ee Ururrada aan Xukuumiga ahayn ee soo dhashay qarnigii tegey daliillada dariiqooyinka faraha badan ee dadku jecel yihiin annagu in annu u dejinno si awoodahooda loo horumariyo. Sida adeegyadan oo kale idilkooda, waxaad u baahan doontaa inaad go'aansato, haddii ay micne samaynayso inaad isticmaasho iyo haddii kaleba, iyada oo ku salaysan ujeedadaada barashada. Way dhici kartaa inay u shaqayso si wax-ku-ool marka loo dejinayo taxane barnaamijyo tababar ah madaxda Ururro Aan Xukuumi ahayn iyo kuwa Bulsho ku Sal-leh, ama loogu samaynayo is-afgaransiin shir ballaadhan oo loo qabanayo ururro kuwaa la mid ah oo isku deyaya sidii ay uga bogan lahaayeen fahamka doorarkooda marka ay wax-ka-qabadka dhibaato xoogleh wadaan, sida fiditaanka AYDHISKA. Icticmaala malihiina inaad ku dul dhistaan fikradaha lasoo jeediyey.

Ujeedada barashada: Waa sidii kor loogu qaadayo fahamka ku saabsan isku-jirka hodanka ahee hay'adaha Ururro Aan Xukuumi ahayn iyo kuwa Bulsho ku Sal-leh ee jira iyo fursadaha u jira horumarintooda.

Waqtiga loo baahan yahay: Layliga sidii loo soo ban-dhigay waa inuu qaato laba ilaa saddex saacadood oo hadba ku xidhan tirada kasoo qayb-galeyaasha ah ee aad la shaqaynayso iyo haddii aad ku darsato tallaabada ugu dambaysa iyo haddii kale.

Qalabyada loo baahan yahay: waxaad u baahan doontaa xaddi badan oo waraaqo waaweyn tibaax-tus dusha ku leh sumado nooca Ururrada aan Xukuumi ahayn sida GRSO, VSO, BINGO and PVDO. Haddii aad u baahato fikrado dheeraad ah oo ku saabsan noocyada kala duwan ee Ururro Aan Xukuumi ahayn iyo kuwa Bulsho ku Sal-leh iyo micnaha sugan ee xarfahan lagasoo qaatay yihiin, fiiri lifaaqa 2aad. Waxa intaa raaca, samee waraaqo kale oo lagu qoro ururrada noocyo kale ah, sida dawladda hoose, wasaaradaha qaran iyo hay'adaha guud oo kale, ururrada deeq-bixiyeyaasha waaweyn ah oo caalami ah iyo xataa shirkadaha gaarka ahee ka hawl-gala jiddiinna. Samee waraaqo ku filan si uu mid kasta oo idinkala qayb-gelaya fadhigiinna uu mid u helo. Yaanu ku gelin werwer ku saabsan inaad laba jeer qorto.

HAB-SOCODKA

Layligan waxa loosoo ban-dhigay laba qaybood. Labadaba waxa loo isticmaali karaa kala gaar ahaan ama iyaga oo la isku badhxo, oo ku xidhan hadba waxa aad rabtid inaad hirgeliso. Qaybta hore waxay khusaysaa noocyada hay'adaha ururrada aan xukuumiga ahayn iyo kuwa

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU
SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

Bulshada ku sal-leh ee adduunka meelwaba ka jira. Caqliyadda ka dambaysa isticmaalka layligani waa kor u qaaddida waacinimada ku saabsan jiritaanka kala duwanaanta noocyada ururrada iyo in lasoo bandhigo fikradaha buug-hawleedkani xambaarsan yahay, sida abuurka is-bahaysiyo

istaraatejiyad ku dhisan iyo shebekad-xidhiidhinta. Qaybta labaad, tallaabada 7aad, waxay khusaysaa masalooyinka ku saabsan dhisidda awoodda ee la xidhiidha abuuridda xirfado lagaga dhex shaqaynayo is-bahaysiyo ururro ka kooban.

1. Qaddin layliga adiga oo ka warramaya waxa aad rabtid inaad samayso. Waxaannu kuusoo jeedinaynaa inaad xulato masalo ama mashkalad aad ugu adag hal urur kelidii oo u baahan inay isugu tagaan ururro badan oo kala noocyo ahi. Male ahaan, tani waa mashkalad xilligan u taalla intiinna ka qayb-gelaysha ah dhammaantiin. Muqaddamad suurto-gal ah waxa lagu soo bandhigay Lifaafa A laakiin waxaannu idinku boorrinaynaa inaad idinku abuurataan mid idinku iska leedihiin oo ku salaysan waaya-aragnimada ka-qayb-galeyaasha.
2. Qaybi waraaqo-tusmeedyo waaweyn oo ay ku daabacan yihiin magacyo xarfo lagu soo gaabiyey ee noocyo kala duduwan oo Ururro Aan xukuumi ahayn iyo kuwa Bulsho ku Sal-leh iyo weliba noocyada kale ee ururro ah ee laga metelo degaankiinna kasoo qayb-gale walba hal. Liisto lagu soo jeediyey oo Hay'ado ah ayaa kuugu taxan Lifaafa 2aad.
3. Weydii ka qayb-galeyaasha inay ku qoraan warqadda dhabarkeeda magaca urur ay isu dhigmaan nooca ku qoran warqadda boggeeda hore. U bayaami in aanad weydiinnin iyaga inay qoraan magaca ururka ay ficlan u shaqeeyaan ee aad weydiisey magaca urur dhab ama macmal ha ahaadee, ah mid ay isceliyaan kuwa ku taxan warqadda. Haddii ururka mid ficlan ka shaqeeyaa ku habboon yahay sheekada hordhaca, waa ansax in la isticmaalo.
4. Adigoo ku salaynaya sheekada hordhaca aad ku sheegtay tallaabada 1aad, weydii inay curiyaan Is-bahaysi ururro dhawr ah ka kooban oo ay jeclaan lahaayeen inay ka wada shaqeeyaan xallinta mashkaladda. ***Tababare digtoonow! Waxaad u baahan doontaa inaad ogaatid tirada is-bahaysiyo kala duwan ee aad ka rabtid ka-qayb-galeyaasha layligan dhexdiisa. Haddii kalese, waxa dhici inay dhammaan ku dambeeyaan inay isugu yimaadaan koox qudha oo weyn. Isticmaal qiyaastaada laakiin ka fikir inay samaysmaan inta ay ugu yartahay afar is-bahaysi oo kala duwan.*** Weydii inay isu wareejiyaan kooxdu dhexdeeda ilaa ay helayaan shuraakeyaal ay doonayaan inay is-bahaysi la galaan. Tani waa marka layligu ama noqdo mid xiise leh ama uu dib ugu dhalan-rogo qas. Mid kastoo is-bahaysi bilaw ahi wuxu ogaan doonaa inay u baahan yihiin ururro noocyo kale ah oo cidi ka metesho is-bahaysigooda haddii ay doonayaan inay ku guulaystaan gelidda mashkaladda lagu siiyey tallaabada 1aad. Waxay u baahan doonaan inay gorgortan la galaan kooxo hoosaadyo iyo inay is-weydaarsadaan xubnaha is-bahaysiyadoodii bilawga hore. Qaybtani layliga ka mid ahi waa inay qaadataa waqti ilaa 30 miridh ah.
5. Ka dib marka ay dhisaan is-bahaysiyadooda, weydii koox is-bahaysi kasta inay dul-maraan istaraatejiyad ballaadhan oo ay ku sharxayaan sida ay u qorsheeyaan inay ku wada shaqeeyaan gelidda mashkaladda loo diray. Sii waqti 20 ilaa 30 miridh ah.
6. Dib-u-shirsii kooxo-hoosaadyada oo weydii inay idin baraan xubnaha is-bahaysigooda, sharxaan sida ay isugu xidhmayaan iyo inay bandhigaan istaraatejiyada ay ku wada shaqaynayaan. U oggolow tan 20 miridh ama wax sidaa u dhow.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

7. Hawsha tan xigtaa maaha khasab waxaanay khusaysaa koox kasta oo curinaysa aqoon-isweydaarsi awood dhis ah ama taxane kulanno aqoon-isweydaarsi ah si ay uga baaraandegaan baahiyahooda barasho ee ku salaysan sidii ay shaqo wax-ku-ool u qaban lahaayeen is-bahaysi ahaan. Haddii aan goosato inaad tallaabadan ku darto, weydii inay dib ugu noqdaan kooxahoodii is-bahaysiyada iyo inay dejiyaan guudmarka barnaamij tababar oo ku wajahan wax ka qabadka baahidooda xirfadeed ee ku saabsan sidii ay is-bahaysi wax-ku-ool ah ugu shaqaynayaan. Marka la raaciyo shirarka iyo warbixinaha, tallaabadani waxay ku biirinaysaa 60 ilaa 70 miridh oo kale barnaamijkaaga.

LIFAAQA 1: HOR-DHAC KOOBAN EE QISADA; LAAKIIN HAKA WAABAN INAAD ABUURTO TU AAD ISKA LEEDAHAY.

Fagaaruhu waa degaan magaalada ah oo dadkeedu ilaa 250,000 qof yahay. Baaxadda beesha magaalada waxa dhici karta inuu ka weyn yahay ka midda aad hadda ka shaqayso, laakiin waxa loo xushay in laga helo hay'ado noocyo si fiican isugu dhafan ahoo laga abuuri karo tiro is-bahaysiyo shaqeeya ah.

Waxa jirey hayaan weyn oo qoysas reer miyi ahi kusoo degeen magaalada sannadihii dhowaa, waxanay abuuray dhibaatooyin bulsho iyo dhaqaale oo halis ah. Inkasta oo ay jireen shirar yaryar oo badan in madaxda beesha qabteen si ay ugaga doodaan dhibaatooyinka la xidhiidha hayaanka kusoo fatahay magaalada, waxa la moodayey in midkood waliba lahaa ajandhiisa u gaar ah ee ku saabsan waxa laga yeelayo. Maayarka magaalada oo uu ku dhacay culayska dhibaatada geeddiga wuxu hadda kasoo laabtay shirweyne qaran oo maayarradu lahaayeen. Fadhiyadii shirweynaha midkood waxa jirtey dood ku saabsanayd muhimadda ay leedahay abuurka is-bahaysiyo lala galo noocyo kala duwan Ururrada Aan Xukuumi Ahayn, kuwo Bulsho ku Sal-leh iyo ururrada dhaqaalaha gaarka ah iyo kan rayidka kasoo jeeda oo laga wada shaqeeyo wax-ka-qabadka dhibaatooyinka adadag sida tan qoysaska miyiga ee kusoo hayaama degaannada magaalada. Maayarkii wuxu lasoo laabtay isaga oo aad ugu hanweyn inay suuro-gelayso dhismaha dhawr is-bahaysi oo maxalli ah si loo waajaho dhibaatada geeddiga miyiga.

Wuxu u shaqaaleeyey dhawr tababare degaanka ah inay isugu dubba-ridaan aqoon-isweydaarsi maalin ah si loogu dhiso is-bahaysiyadan waxaanay soo ban-dhigeen layli ballaysin ah oo aad ugu eg mid kala kulmeen buug-hawleed hay'ada UN-HABITAT dhowaan usoo saartay Ururrada Aan Xukuumi Ahayn iyo kuwa Bulsho ku Sal-leh oo ka hadlayey Dhisidda Awoodda Fiditaanka Ururreed. Waxa aad inyar ula saarantahay inaad la kulantid siday isticmaaleen layliga ku saabsan sida loo dhisayo is-bahaysiyo ku salaysan xiisaha Maayarku u qabo helitaanka dariiqooyin cusub oo lagusoo abaabulo ururro kala duduwan oo maxalli ah si loo waajaho dhibaatada hayaanka.

LIFAAQA 2:

LIISASKA LOO SOO JEEDIYEEY OO NOOCYADA URURRADA AH SI AAD UGU DARSATO LAYLIGA DHISIDDA IS-BAHAYSIYO

- **GRO** Urur Gun-ka-dhis
- **GRSO** Urur Gun-ka-Dhiska Taageera
- **LNGO** Urur Maxalli ahoo Aan Xukuuni Ahayn
- **CBO** Urur Bulsho Ku Salaysan
- **PVDO** Urur Gaar ah oo Horumarin Iskaa-wax-u-qabso ah
- **INGO** Urur Caalami ah oo Aan Xukuumi Ahayn
- **NNGO ama BINGO** Urur ama Ururweyne Aan Xukuumi Ahayn oo waddani ah
- **UNGO** Dalladda Urur Aan Xukuumi Ahayn
- **RNGO or ENGO** Urur Aan Xukuumi Ahayn oo Diini ah ama Isir
- **VSO** Urur Iskaa wax u qabso Taageere ah
- **IPA** Machadka Maamulka Guud

Iyo noocyada kasta ee ah ururro kale oo ay yaqaanniin ka-qayb-galeyaashu Ugu biiri Waraaqo kale Daabacan:

- **LCB** Meherad Ganacsi oo Waddani ah
- **BIC** Shirkad Weyn oo Caalami
- **BDA** Urur Horumarineed oo heshiis laba geesood ku shaqeeya sida DANIDA
- **LCC** Rug Ganacsi oo Maxalli ah
- **MDA** Urur Horumarineed oo Wejiyo badane ah sida UN-HABITAT ama Baanka Adduunka.
- **LICO** Urur Adeegga gudaha oo Caalami ah sida Rotary Lions

Ha ka walaacin inaad ku dawaariso liiskan xaaladaada gudaha si aad ugu darsato kuwa kale ee laga yaabo inay kaa maqan yihiin. Waxa kaloo aad u baahan doontaa inaad waraaqo laba celis ah samayso adigoo ku salaysanaya tirada ka-qayb-galeyaasha iyo aqoonta aad u leedahay ururrada cid meteshaa ka joogto aqoon-iseydaarsiga.

QALABKA 2: ABUURIDDA QORSHE ISTARATEJI AH EE FIDISTA WAR-IS -GAADHSIINTA

Ujeedada Barasho: Layligani wuxu leeyahay laba himilo barashadiisu

- In la kordgiyo aqoonta iyo xirfadaha sida loo dejiyo Qorsheyaal Istarateji ah oo fiditaanka war-is-gaadhsiineed; iyo
- In ka-qayb-galeyaasha midkood walba fursad loo siiyo inuu dejiyo asaasyada qorshe istarateji ah oo fiditaanka war-is-gaadhsiineed ee ururkiisa ku wajahan.

Layligani wuxu aad ugu munaasib yahay dedaallada qaf ahaaneed iyo kooxaha maaraynta maa daama dhugmadiisu u mudani saarantahay qoridda qorshe war-is-gaadhsiineed. Haddana haba ahaatee, waa lagu dabbiqi karaa in lagu isticmaalo dejinta aqoon is-weydaarsi. Haddii aad goosato inaad ku darsato shaqadan aqoon-isweydaarsi, waxay kaalmayn doontaa hab-socodka barashada oo waxay ku heli ka qayb-galeyaasha oo keena midhadh metaallo ku saabsan waxyaabo ay yeelaan si ay ula sameeyaan xuduudda ururkooda xidhiidho ka baxsan; sida war-saxaafadeed, warbixin sannadeed, war-murtiyeed waajibaad. Dariiqo kale oo loo naaxiyo waayo-aragnimada barashadan khaas ahaanteed, waa marka la adeegsado Adeegga 3aad ee ku saabsan Dhegeysiga Firfircoon iyadoo uu qayb ka yahay geeddi socodka lagu raadinayo in ka-qayb-gale ama koox maarayneed walba helaan fursad ay qorshahooda kula wadaagaan tiro yar oo ka ka-qayb-galeyaal ah. Tilmaamaha soo socdaa waxay ku salaysan yihiin adeeggan oo lagu isticmaalayo hawlaha aqoon-is-weydaarsi.

Waqtiga ay qaadanayso: Waa inaad u qorshaysaa qiyaas ah maalin badh layligani inu qaato, maa daama ay ku jiraan hawl shakhsiyeed badan iyo fursado qorsheyaal lagula naaqisho ka-qayb-galeyaal kale. Haddii aad goosato mar kale isticmaalka layliga Dhegeysiga Togan(Adeegga 3), ku dabbaq baahiyahaaga waqti sida ku munaasib ah.

Alaabta loo baahan yahay: Istimaal shaxaha lagu siiyey iyo alaabta noocii ay doontoba ha ahaatee, aad ka-qayb-galeyaasha u sheegtay inay soo qaataan ee bixinaya metello ku saabsan dedaalladooda fiditaanka war-is-gaadhsiineed.

HAB-SOCODKA

1. Ku bilaw fadhiga layli dood wadaag fikrad curin ah ama albaab kale oo xog-urursi ah si aad u dhaliso godol fikradeed oo ku saabsan wixii ay tahay in lagu daro qorshe Fiditaan war-is-gaadhsiinta urur iyo sababta uu qorshe caynkaas ahi muhiim ugu yahay Ururrada Aan Xukuumiga Ahayn iyo Ururrada Bulsho ku-sal-leh inay abuuraan oo ay ugu shaqeeyaan joogsi la'aan.
2. Qaad dood gaaban oo jihaysan kuna saabsan geeddi-socod ku salaysan afkaarta lagu soo cabbiray Cutubka koow: Qaybta koowaad ee ictiqaadyada iyo istaraatejiyadaha, waraaqihii loo bixiyey layliga, iyo waaya-aragnimada iyo aqoonta adigu aad u leedahay mawduuca.
3. Weydiiso ka-qayb-galeyaashu inay u shaqeeyaan keli keli ahaan muddo 30-45 daqiiqo ah inay ku dhammeeyaan weydiimaalaha qorshaynta fiditaanka war-is-iskaadhsiinta. Haddii in ka badan hal qof oo urur qudha ka socdaa aad ogaato inay isku koox yihiin, waad rabi doontaa inaad siisid fursad ay ku wada shaqeeyaan koox ahaan. U qaybi naqshadda qorshaynta, dul mar su'aalaha ay ka jawaabi doonaan kana jawaab wixii su'aalo ah ee ay kasoo jeedin doonaan weydiimaalaha(questionnaires) ama hawsha.
4. Inta ay ka-qayb-galeyaashu ku hawlan yihiin qorsheyaashooda, usii diyaari waraaqaha boodhadhka ama sabuurad cad oo ay ku qoran yihiin nuqullada baahiyo qiimaynta su'aalo-hawleedkii Tallaabadii B ee warqad-hawleedka qorshaynta. Tan u adeegso ka-qayb-gale kastaa inuu ku dul calaamadiyo qiimayntiisa mid kastoo ka mida lixda baahiyood ee fidista war-is-gaadhsiinta marka aad dib u shiriso iyaga(tallaabada ku xigta).
5. Dib u shiri ka-qayb-galeyaasha oo weydii iyaga inay qoraan dhibcohooda ay kasoo sameeyeen Hawsha B ee qiimaynta baahiyaha fiditaanka war-is-gaadhsiinta. Qabo dood kooban oo ku saabsan natiijooyinka, adiga oo dhugmada ku jeedinaya qaarkood kala duwanaanta iyo isku mid ahaanta ku jira dhibcaha.
6. Wax uga sheeg Hawsha 7aad, fursadda qof waliba ugu sharxayo qorshihiisa ka-qayb-gale kale iyada oo qof saddexaadna door goob-jooge u weheliyo. Qasdiga hawsha ku xigtaa waa in laga helo jawaab-celin ku saabsan qorsheyaasha qofeed iyo in la bayaamiyo baahida iyo xirfadaha uu kulmiyo dhegeysiga firfircooni. Inta aynaan u kala qaybinin kooxda weyn kooxo-hawleed yaryar oo saddex-saddex qof ah, qabo dood jihaysan oo ku saabsan muhimadda iyo xirfadaha ku kulmiyo dhegeysiga Firfircooni. (Haddii aan goosatay inaad isticmaasho Adeegga 3aad, ee kan daba socda, immika ayuu taagan yahay waqtigii la bandhigeysey).
7. U qaybi ka-qayb-galeyaasha kooxo saddex ah oo weydii inay doontaan meelo jab-la' ah si ay ugu qabsadaan hawsha dambe ee xigta. Qof kasta oo ka tirsan koox saddex-qofley ahi waa inuu markiisa jeediyaa qorshihiisa/heeda war-is-gaadhsiineed iyadoo marba labada qof ee kalena doorka dhegeyste firfircoon iyo goob-jooge ka noqonayaan sheekada labada qof dhex maraysa. Mid kasta oo fadhiyada qorshe jeedin iyo war-bixin-celinaha ka mid ah waa inuu qaataa 15 miridh ama 45 miridh saddexda isu-geyntood. U oggolow 15 miridh oo kale in kooxaha yaryari ay kaga doodaan waaya-aragnimadooda iyo inay ku diyaarsadaan faallooyinka ay ka qabaan waaya-aragnimadii wadaagga fadhiga caadiga ahaa oo ay ku jirto wixii ugu muhiimad weyn kooxda u lahaa dhinaca barashada.

***DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU
SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED***

8. Dib ugu qabo kooxaha shir gebgebayn ay kaga doodaan waaya-aragnimadaa. Koox walba weydii inay jeediyaan wax-barashadii u muhiimsanayd ee ay ka heleen layliga.

LIFAAQA 1AAD

QORSHE ISTARAATIJIYADEED EE LAGULA XIDHIIDHAYO XUDUUDAHA DIBADDA

(Magaca Ururkiinna)

Waxa diyaariyey: _____

Taariikhda: _____

A. Waajibaadka Ururka:(Sababta ugu horraysa ee aan u jirno)

B. Qiimaynta baahyaheenna aan u qabno Is-gaadhsiinta Dibadeed

(1= baahiya ma jirto; 3=baahi meel dhexaad ah; 5=baahi weyn)

1. Si aan kor ugu qaadno muuqaalkeenna beesha dhexdeeda.

1 2 3 4 5

2. Si aan loogu dhaliyo fikrado iyo tilmaamo togan oo ku saabsan ururkiinna iyo waajibaadkiisa inay beesha oo dhan dhexdeeda ugu faafto.

1 2 3 4 5

3. Si loo kordhiyo wacyiga ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyadeenna kooxaha gaar ahaaneed ee isticmaala dhexdooda.

1 2 3 4 5

4. In la gardaadiyo isbeddel fikradaha xubno cayiman oo beesha dhexdeeda ah ka qabaan ururkiinna iyo barnaamijyadiisa.

1 2 3 4 5

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

5. Si looga soo dhaliyo kaalmo iyo tabarucaad maaliyadeed ilo dibadeed

1	2	3	4	5
---	---	---	---	---

6. Si loogu abuuro taageero shacbi barnaamijyadeenna iyo adeegyadeenna madaxda beesha iyo muwaadiniinta kale ee haybadda leh.

1	2	3	4	5
---	---	---	---	---

● Dhibcaha ugu badan oo 30 bun ah, ee muujinaya baahida aadka ahee loo qabo in xidhiidho lala sameeyo doc walba isla mar, qiyaasteenna war-is-gaadhsiintu waa: _____ (Isu geynta guud ee lixda dhibcood)

C. Iyada oo ku salaysan qiimaynta kor ku xusan, saddexda ugu sarreeya baahiyaheenna ugu mudan ee xidhiidhka aynu la yeelanayno kuwa kale ee ururka dibadda ka ah waxay yihiin: (Ku qor dhulka bannaan ee so socda, saddexda kuugu mudnaana sarreeya, marka lagu saleeyo dhibcaha ugu sarreeya.)

1.	
2.	
3.	

D. Fursad u helidda Khayraadka war-baahinta: Aqoonsanaanta baahida loo qabo adeegsiga war-baahinta guud mar kasta oo ay suurto-gal tahay si aynu ugu tebinno farriinteenna beesha

Wargeyska (yada)

● _____	1	2	3	4	5
● _____	1	2	3	4	5

Warbaahinta kale ee Daabacan sida, Ogeysiisyada, war-sideyaasha kooxeed

● _____	1	2	3	4	5
● _____	1	2	3	4	5
● _____	1	2	3	4	5

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

Maxaddadaha Idaacadeed

● _____	1	2	3	4	5
● _____	1	2	3	4	5

Maxaddadaha Tilifishannada

● _____	1	2	3	4	5
● _____	1	2	3	4	5

Websaytyada iyo E-meylada

● _____	1	2	3	4	5
● _____	1	2	3	4	5

Waddooyinka kale ee suurto-galka ah wada xidhiidhka kooxaha dano wadaagtaan

● _____	1	2	3	4	5
● _____	1	2	3	4	5

(Ku dar wixii xog ama fikrado dheeraad ah oo laga yaabo inaad haysid kuna saabsan sida loo adeegsado war-baahinta dibadda iyo khayraadka war-is-gaadhsiineed ka hor inta aanad curinnin qorshe-hawleedkaaga)

E. Iyada oo ku salaysan qiimaynta baahiyaha iyo fursadaha aynu u haysano khayraadka war-baahino kala duduwan, saddexda inoo ah mudnaanaha u sarreeya iyo qorshe-hawleedkeenna ku wajahan hir-gelintooda waa kuwa soo socda:

Mudnaanta 1: _____: ***Maxay tani u tahay mudnaanteenna 1: Ka bixi faah-faahinta u badan ee idiin suurto-galka ah, si aad u fahamtaan WAAYADA ka dambaysa baahiyaha; isticmaal xaashi dheeraad ah, haddii loo baahdo.***

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- ***Kuwa aynu u baahannahay inaan xidhiidh la samaysanaa waa: isku koob inta kuu suurto-galka ah ee aad karto- aad ugu koobnow- shakhsiyaad, kooxo ama ururro.***

- ***Dhambaalka cayiman ee aan doonayno inaynu gudbinaa waa:***

- Istaraatejiyada iyo tabaha ugu fiican ee lagu heli karo dhambaalladaas inay u gudbaan sida ugu bayaansan uguna dhaqso badan ee suurto-gasha: Istaraatejiyad waa sawirka weyn ee lagu hawl-gelayo; Tabuhuna waa tallaabooyinka cayiman ee lagu hir-gelinayo istaraatejiyad. Isticmaal ka badan xaashida inta bannaan haddaad u baahato.

- Istaraatejiyad Guud

- Tallaabooyinka loo raacayo hir-gelinta istaraatejiyada. Ha illaawin inaad dib u eegto qiimayntaadii dariiqooyinka War-baahinta iyo war-is-gaadhsiinta marka aad curinayso qorshe-hawleedkan iyo kuwayawgii kale ee ku salaysnaa mudnaanahaaga ku jirey.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- Waxaan qorshaynaynaa inaan qaadno tallaabooyinka soo socda si aan u xaqiijinno in dhambaalladayadii loo qaatay sidii aan ula jeedney. Kani waa qorshihii qiimaynta si loo ogaado najaxaadda.

- Khayraadyada aan ugu baahan doonno hir-gelinta qorshahani waa: Ku dedaal inaad intii suurto-gal ah ku koobnaato waxyaabo ay ku jiraan xoogga beni aadanka, xidhiidho war-baahineed, taageero talo-bixin oo dibadeed iyo sicirka lacageed iwm.

- Sideebaynu ku ogaan doonnaa in istaraatajijadeenni wax-ku-ool noqotay?

- Mudnaanta 2aad: _____: **Maxay tani u tahay mudnaanteenna 2aad: Ka bixi faah faahinta u badan ee idiin suurto-galka ah, si aad u fahamtaan WAAYADA ka dambaysa baahiyaha; isticmaal xaashi dheeraad ah, haddii loo baahdo.**

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- ***Kuwa aynu u baahannahay inaan xidhiidh la samaysanaa waa: isku koob inta kuu suurto-galka ah ee aad karto- aad ugu koobnow- shakhsiyaad, kooxo ama ururro.***

- ***Dhambaalka cayiman ee aan doonayno inaynu gudbinaa waa:***

- **Istaraatejiyada iyo tabaha ugu fiican ee lagu heli karo dhambaalladaas inay u gudbaan sida ugu bayaansan uguna dhaqso badan ee suurto-gasha: Istaraatejiyad waa sawirka weyn ee lagu hawl-gelayo; Tabuhuna waa tallaabooyinka cayiman ee lagu hir-gelinayo istaraatejiyad. Isticmaal ka badan xaashida inta bannaan haddaad u baahato.**

Istaraatejiyad Guud

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- Tallaabooyinka lagu hir-gelinayo istaraatejiyada

- Waxaan qorshaynaynaa inaan qaadno tallaabooyinka soo socda si aan u xaqiijinno in dhambaalladayadii loo qaatay sidii aan ula jeedney. Kani waa qorshihii qiimaynta si loo ogaado najaxaadda.

- Khayraadyada aan ugu baahan donno hir-gelinta qorshahani waa: Ku dedaal inaad intii suurto-gal ah ku koobnaato waxyaabo ay ku jiraan xoogga beni aadanka, xidhiidho war-baahineed, taageero talo-bixin oo dibadeed iyo sicirka lacageed iwm.

- Sideebaynu ku ogaan doonnaa in istaraatajiyadeenni wax-ku-ool noqotay?

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- Mudnaanta 2aad: _____: **Maxay tani u tahay mudnaanteenna 2aad: Ka bixi faah-faahinta u badan ee idiin suurto-galka ah, si aad u fahamtaan WAAYADA ka dambaysa baahiyaha; isticmaal xaashi dheeraad ah, haddii loo baahdo.**

Kuwa aynu u baahannahay inaan xidhiidh la samaysanaa waa: isku koob inta kuu suurto-galka ah ee aad karto- aad ugu koobnow- shakhsiyaad, kooxo ama ururro.

- **Dhambaalka cayiman ee aan doonayno inaynu gudbinaa waa:**

- Istaraatejiyada iyo tabaha ugu fiican ee lagu heli karo dhambaalladaas inay u gudbaan sida ugu bayaansan uguna dhaqso badan ee suurto-gasha: Istaraatejiyad waa sawirka weyn ee lagu hawl-gelayo; Tabuhuna waa tallaabooyinka cayiman ee lagu hir-gelinayo istaraatejiyad. Isticmaal ka badan xaashida inta bannaan haddaad u baahato.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

Istaraatejiyad Guud


- Tallaabooyinka lagu hir-gelinayo istaraatejiyada:

- Waxaan qorshaynaynaa inaan qaadno tallaabooyinka soo socda si aan u xaqiijinno in Dhambaalladayadii loo qaatay sidii aan ula jeedney. Kani waa qorshihii qiimaynta si loo ogaado najaxaadda.

- Khayraadyada aan ugu baahan doonno hir-gelinta qorshahani waa: Ku dedaal inaad intii suurto-gal ah ku koobnaato waxyaabo ay ku jiraan xoogga beni aadanka, xidhiidho war-baahineed, taageero talo-bixin oo dibadeed iyo sicirka lacageed iwm.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- Sideebaynu ku ogaan doonnaa in istaraatajyadeenni wax-ku-ool noqotay?



QALABKA 3: HORUMARINTA XIRFADDA DHEGEYSIGA FIRFIR-COON EE WAX-KU-OOLKA AH

Ujeedada barasho: In lasoo qadimo fikrado cusub oo ku saabsan xirfadaha dhegeysi firfircoon iyo in kor loo qaado fahamka iyo xirfadaha ka-qayb-galaha ee farshaxanka dhegeysiga.

Waqti uu qaadanayo: Ilaa saddex saacadood

Alaabta loo baahan yahay: Nuqullo uu helo ka-qayb-gale kasta hal bog oo sharaxa muunad CARESS ku yaal iyo nuqul ah mid kastoo saddexda warqad-hawleed ah.

HAB-SOCODKA

1. Soo jeedi layliga adiga oo weydiinaya qof kastaa inuu ka fikiro dhacdo saamayn jiidasho oo weyn ku lahayd noloshiisa/sheeda. Waxay noqon kartaa waaya-aragnimo wanaagsan, xun, huq reeb, farxadeed, murugo mid kasta oo ay noqoto. Ha ogaadaan iyagu in la weydiin doono inay qof kale uga sheekeeyaan wax ku saabsan waaya-aragnimadan, qofka ay tahay shaqada loo diray tahay inuu noqdo dhegeyste firfircoon, iyo qofka saddexaad ee sheekada kula jiraa uu noqon doono goob-jooge ugamana qayb-geli doono sheekada si firfircoon. Sheekadu waa inay qaadata wax aan ka yarayn 10 miridh kana badnaan 15 miridh. Sii daqiiqado yar inay ka fikiraan wax ku saabsan waxa uu uga sheekayn doonaan qofka kale. Qoraallo midhadh ah bay samayn karaan haddii ay sidaa doonayaan.
2. Qabo dood jihaysan oo ku saabsan muhimadda dhegeysiga firfircooni Istaraatejiyad fiditaan inuu yahay Ururrada Aan Xukuumi Ahayn iyo kuwa Bulsho ku-sal-leyda ah dhexdooda, marka loo tix-raaco alaabooyinka ku jira Cutubka kow Qaybta 1aad ee ku tacalluqa buug-hawleedka Fiditaanka Ururreed. Iyadoo qayb ka ah doodan jihaysan, soo ban-dhig muunadda habka CARESS. Sii qof kasta nuqul waraaqaha ka mid ah, si ay u tix-raacaan iyada inta dooddu socoto.
3. Ka dib dooddaa jihaysan marka lagu guulaysto geba-gebaynteeda, weydii ka qayb-galeyaasha inay isu kala jejebiyaan kooxo yaryar oo saddex saddex ah iyo inay helaan meel jabaq-la' ah oo ay ku sheekaysan karaan. Iyaga u sheeg in iyaga midkood waliba meteli doono saddex door labada saacadood ee innagu so fool-leh: 1) Sheeko sheegi tebin doona tii ugu muhimsanayd waaya-aragnimadiisii nololeed. 2) Dhegeyste firfircoon ee muujin doona sifooyinka muunadda CARESS inuu yahay dhegeyste firfircoon. iyo 3) Goob-joogaha isagoo aammusan daawan doona sheekada oo qiimeeya tayada hab-dhaqanka dhegeystaha inta ay socoto sheekada ku salaysan dariiqada CARESS.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

4. Waxa kaloo aad ku amartaa inta aanay u amba-bixin kooxo-hoosaadka saddex-leyda in iyaga midkood kasta laga filayo inuu sameeyo mid kasta oo saddexda door ah iyo inay u haystaan waqti dhan 2 saacadood inay ku dhammeeyaan saddexda sheeko iyo war-bixinaha isticmaalka xirfadaha dhegeysi ee ku salaysan qiimayntii weydiimaalaha. Ku dhiirri-geliinay is-barbar-dhigaan dhibcahooda qof qof ahaaneed ee dariiqada CARESS iyo inay ka hadlaan kuwan micnahoodu wuxu yahay marka lagu xisaabtamo sida loo noqonayo dhegeyste wanaagsan. Ha illaawin inaad u gudbiso waraaqo-hawleedyada qiimaynta saddexda ah ka-qayb-gale kasta inta aanay u kala kicitimin raadsiga meelihii jabaq-la'da ahaa ee ay ku shaqayn lahaayeen.
5. Dusha kala soco sida wax u socdaan oo dib u shirsii saddex-leyda markay dhammaystaan shaqooyinkooda. Weydii waxyaabihii ay arkeen ee ku saabsanaa sida ay wax-ku-ool dhegeysteyaashu ugu ahaayeen doorkoodii, maxay ahaayeen waxyaabii ugu adkaa ee doorkooda ku saabsan, iyo su'aalo kale oo la hal-maala oo loo naqshadeeyey kordhinta fahamka xirfaddan war-is-gaadhsiineed iyo ahmiyadda ay u leedahay dhisidda awoodda fiditaan ee ururkooda. Usoo jeedi, haddii aanay hore usoo yeelin sidaa, in la siiyo dhegeystaha firfircoon oo kasta ee koox walba labada kalee warqad-hawleed ee qiimaynta wax-qabadyadooda.

LIFAAQA 1AAD: CARESS-ING JIDKAAGA DHEGEYSI FIRFIRCOON OO WAX-KU-OOL AH

Tony Alessandra iyo Phil Hunsaker buuggoodii Xidhiidh samaynta shaqada dhexdeeda waxay ku leeyihiin waxaynu u baahannahay inaan curinno lix xirfadood si aan u gaadho heerka ugu sarreeya ee aqoonyahannimada dhegeysi. Waxa ay u nidaamiyeen iyaga dariiqo nooc ah si ay u sameeyaan erey u akhrisma CARESS (Xarfahaasina waxa ay u taaganyihiin ereyada afka ingriisiga ah ee kala ah: Concentrate -- Dhugmolahaansho; acknowledge--Tixgelin; Research--cilmibaadhis; Exercise emotional control--xakamaynta caadifadda; sensing the non-verbal message--macnaysiga dhambaalka aan hadalka lahayn; structure--qaabdhismeedka).

- **Dhugmo lahaansho:** Liishaanka dhugmadaada ku jeedi qofka hadlaya *iyo keliya qofka hadlaya*. Iska baabii sawaxanka bii'adda kugu xeeran.
- **Tix-gelin :** Qofka hadlayaa waa inuu la socodkaaga iyo tix-gelintaada ka dhex ogaado muuqaallada togan, kulanka indhaha- aanayse eegmo iyo daawasho ku jirin, jawaab afka ah sida weydiinta su'aalo caddayneed iyo hadallo gunuus micne la'aaneed oo "Hmmm", "ma kaa dhabbaa" iyo "Haa", fadlan sii wad" oo kale ah. Wax-yar oo calaamadaha jidhka ee togan ah ayaa ah mid kale oo garansiisa joogitaankaaga maskax ahaaneed sida ilka-caddayn iyo hore usoo janjeedhsi oo ah xiise muujin, madaxaaga inaad ruxdo oo ah oggolaan, iyo dabcan muuqaallada jidh oo kale ee habboon. Si kale oo aad u sheegto wixii la yidhi waa dariiqo marag fur u ah inaad si firfircoon u dhegeysanayso.
- **Baadhitaan:** Kani maaha micnihii caadiga ahaa ee baadhitaan laakiin waa baadhis lagu bayaaminayo dhambaal, lagu kaalmaymeeyo hadal jeediyaha inu faahfaahiyo qodob uu markaa sheegay, ama inuu hoos ugu yar dhaadhaco. Dhegeysi firfircoon oo ah wax ka geddisan aamminaadda dadweyne, wuxu khuseeyaa si sharci ah oo loo hadlo Weliba. Way dhici kartaa inaad ku caawin doonto hadal jeediyaha inuu sheekada u leexiyo dhinac uun xaglo kooban si uu u dhasho is-faham. Baadhitaan aad samaysid dhegeyste firfircoon ahaan waa sidiiyoo aad buug kaydiso ka ammaanaysanayso furaha rugta kutubta si aad ula aragto iyada waxa gudihisa yaalla oo kale.
- **Xakamaynta Caadifadda:** Tan looma baahan micnaheedu inuu yahay naftaada oo ka joojisinayso inay dagaallanto. Waxay u badan tahay wax la xidhiidha waxyaabaha yaryar ee mararka qaar ama innaga qasa dhegeysteyaal ahaan ama sabab inoogu ah inaynu u tarjumano dhambaalka si qaldan sida codka qofka hadalka jeedinaya ama dariiqada uu u hadlaayo; isticmaalkiisa ereyo rasaysan sida kuwa la xidhiidha isir, galeenka ama dareen la'aansho arrimaha midabbada; ama ha noqoto xataa muuqaalka jidheed ee hadal jeediyaha oo ku salaysan caadooyinkeenna waxa ay ugu micnaysan tahay.
- **Micnaysiga Dhambaalka aan hadalka ahayn:** War-is-gaadhsiintu waxa ay yaalaa tahay wax uga dhow inay ku lug leedahay sida aynu wax u nidhaahno waxa aynu ku hadallo. Cilmi faneedka akhriska war-is-gaadhsiinta aan hadalka ahayn, waa mid had iyo jeerba khaas u ah dhaqan cayim, hase yeeshee aad u muhiim ah. Isku day inaad akhrido dhambaallada cod iyo muuqaal iyo weliba ereyada sugan ee lagu hadlaayo.

- **Nidaaminta:** Isku day inaad xogta u habayso sidaad u hesho. Caqabaddani waxa ku jira saddex xirfad-hoosaad oo dhegeysi: Ratibaadda wixii aad hesho; isku xig-xigsiinta ama u dhegeysiga nidaamsan ama kala mudnaanshaha waxa la leeyahay; iyo is-barbar-dhigidda waxa la leeyahay sida xaqaa'iq iyo ictiqaadyo, ayidaado iyo caaridaado, iyo xataa is-waafaqsanaanta dhambaalka ku jira.

Fiirada Curiyaha: Waxa aannu si xoog leh ugasoo amaahannay Cutubka Shanaad ee war-is-gaadhsiinta shaqada dhexdeeda ee ay curiyeen Alessandra iyo Phil Hunsaker. Waan u mahadnaqaynaa. Simon iyo Schuster, New York iyo meelo kale oo caalami ahi waxay daabaceen buuggooda 1993.

QIIMAYNTA CARESSING-KA

Bogagga soo socda waxa ku qoran weydiimaaleyaal qiimayneed oo ku salaysan Muunadda CARESS ee dhegeysiga firfircoon. Qiimaynta waxa loo diyaariyey inay ku wada isticmaalaan saddexda qaybaha ka ah layliga oo dhammi curinta iyo doodda Qorshaha istaraatejiga ah ee fiditaanka war-is-gaadhsiinta. Hal qaab waxa loo diyaariyey dhegeystaha, ku kalena goob-joogaha, ka ugu dambeeyana waxa loo diyaariyey qofka isagu ban-dhigaya ama jeedinaya qorshaha war-is-gaadhsiineed.

Waxa ay noqon doontaa mid ka kaalmayn doonta kuwa iyagu isticmaalaya qaababkaa sidii ay u akhriyi lahaayeen qoraalka gaaban ee ka horrayn doona boggan. Saddex qaab waxa loo bix bixin doonaa si kala gaar ah si ay uga caawiyaan inaan lagu laba celin sticmaalkooda aqoon-isweydaarsiga dhexdiisa.

LIFAAQA 2:

QOFKA U GOOB-JOOGAAYA SHEEKAYSIGA INTA UU SOCDO LAYLIGA DHEGEYSIGA FIRFIRCOONI

Waxa soo socda lixda furaha u ah xirfadaha dhegeysi ee muunada CARESS. Waxa aad ku leedahay saddex mas'uuliyadood:

1. In aad la socoto hab-wanaagga uu ahaa dhegeysiga qofka dhegeystaha ah sheekaysigii aad dhegeysatey adiga oo ku salaynaya lixdaa dariiqo.
2. In aad qorto dhacdooyin uu u isticmaalay sax iyo kuwo qalad uu u isticmaalay xirfadaha dhegeystuhu.
3. In aad qiimayso tayadii isticmaalka xirfadaha adigoo saaraya cabbir 1 ilaa 5

Diiwaanka dhacdooyin sax iyo qalad loo isticmaalay xirfadaha dhegeysi ee soo socda. Fiirooyin qoran ka sameey dariiqooyin sugan oo uu dhegeystuhu ama sax ama qalad u isticmaalay xirfadda.

1) Dhugmo lahaansho:

2) Is-garansiin

3) Baadhitaan

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

4) Ku dhaqanka Dhawrida caaddifadda

5) Micnaysiga Dhambaalka aan hadalka ahayn

6) Nidaaminta

Iyadoo ku salayn fikraddii aan ka qaatay, waxaan ku qiimeeyey tayada wax qabad ee dhegeystaha mid kasta oo ka mid ah xirfadaha lixda ahee dhegeysiga firfircoon sida soo socota, aniga oo isticmalaya qiyaasta 1 ilaa 5: oo ay 1=aad bay u xuntahay, 3= wuu ku dedaalayaa, 5= Aad bay u fiican tahay.

1) Dhugmo lahaansho:

1	2	3	4	5
---	---	---	---	---

2) Tixgelin

1	2	3	4	5
---	---	---	---	---

3) Baadhitaan

1 2 3 4 5

4) Xakamaynta caaddifadda

1 2 3 4 5

5) Micnaysiga Dhambaalka aan hadalka ahayn

1 2 3 4 5

6) Qaab-dhismeedka

1 2 3 4 5

U diyaar garow fikradaha aad ka qaadatay inaad la wadaagtid dhegeystaha firfircoon iyo qofka hadalka jeedinaya.

LIFAAQA 2B:

Oo LOOGU TALO-GALAY SHEEKADA QOFKA JEEDINAYA EE QIIMAYN DOONA WAX-KU-OOLNIMADA DHEGEYSTAHA

Sida soo socotaa waa fikradihii aan ka qaatay anigoo ahaa qofkii jeedinayey hadalkii ku saabsanaa tayada xirfadaha dhegeysiga qofkii aan la hadlayey. Qiimaynahaygu oo ku salaysan yihiin wax-qabadkii dhinacyada ay khuseeyaan mid kasta lixda xirfadood ee dhegeysiga, waa sida soo socota: Aniga oo isticmalaya qiyaasta 1 ilaa 5: oo ay 1=aad bay u xuntahay, 3= wuu ku dedaalayaa, 5= Aad bay u fiican tahay.

1) Dhugmo lahaansho:

1 2 3 4 5

2)Tixgelinta

1 2 3 4 5

3) Baadhitaan

1 2 3 4 5

4) Xakamaynta caaddifadda

1 2 3 4 5

5) Micnaysiga Dhambaalka aan hadalka ahayn

1 2 3 4 5

6) Qaab-dhismeedka

1 2 3 4 5

U diyaar garow fikradaha aad ka qaadatay layliga inaad la wadaagtid dhegeystaha firfircoon iyo qofka Goob-joogaha ah.

LIFAAQA 2T: OO LOOGU TALO-GALAY QOFKA DOORKA DHEGEYSTAHA FIRFIRCOON SI UU QIIMAYN UGU SAMEEYO WAX-QABADKIISA/KEEDA KU SAABSAN DOORKAN

Sida soo socotaa waa fikradihii aan ka qaatay ee ku saabsanaa sidii ay ahayd tayada doorkaygii layligu dhegeyste firfircoon. Qiimaynahaygu oo ku salaysan wax-qabadkii dhinacyada ay khuseeyaan mid kasta lixda xirfadood ee dhegeysi waa sida soo socota: aniga oo isticmalaaya qiyaasta 1 ilaa 5: oo ay 1=aad bay u xuntahay, 3= wuu ku dedaalayaa, 5= Aad bay u fiican tahay.

1) Dhugmo lahaansho:

1 2 3 4 5

2) Tixgelin

1 2 3 4 5

3) Baadhitaan

1 2 3 4 5

4) Xakamaynta caaddifadda

1 2 3 4 5

5) Micnaysiga Dhambaalka aan hadalka ahayn

1 2 3 4 5

6) Qaab-dhismeedka

1 2 3 4 5

U diyaar garow fikradaha aad ka qaadatay layliga inaad la wadaagtid qofka hadalka jeedinaya iyo qofka Goob-joogaha ah.

QALABKA 4: IS-QIIMAYN HAB-DHAQANKA SHEBEKAD-XIDHIIDHINTA

Himilooyin Barasho: In hore loosii mariyo fahamka ka qayb-galeyaal ee ku saabsan hab-socodka shebekad-xidhiidhinta loogana siiyo cashar is-qiimaynta dhinacyada shebekad-xidhiidhinta hir-gashay qaarkood.

Wagtiga loo baahan yahay: Is-qiimaynta iyo doodda daba-gal waa inay qaataan waqti 60 ilaa 90 miridh ah. Layligani waxa laga faa'iidi doonaa fursado dheeri ah oo loogu sahan tago mawduucan si aad u qoto dheer, iyada oo ama la isticmaalayo naqshado adiga iska leedahay ama kuwa kan daba socda ee buug hawleedka ku yaalla.

Alaab adeegga loo baahan yahay: Nuqulladii weydiimaalihii nafta qiimaynta

HAB-SOCODKA

Maa daama ay shebekad-xidhiidhintu ay tahay nooc hab-dhaqan oo yuhuun madax bannaan ku dhisan, waa wax aad u khatar leh in loo dejiyo geeddi-socod nidaamsan sidii dadka kale loo siin lahaa fursad ay wax kaga bartaan. Dhinac kalena, shebekad xidhiidhintu waa xirfad muhiim u ah madaxda iyo hawl-wadeenada Ururrada Aan Xukuumiga ahayn iyo kuwa Bulsho-ku-salleyda inay wax badan ka ogaadaan. Dabcan, ka-qayb-galeyaashii aqoon-isweydaarsigii qiimaynta baahiyuhu ee keenay in la curiyo duruustan waxay si xoogleh u dareemeen inay u baahnaayeen inay fahmaan waxa ay shebekad-xidhiidhintu tahay iyo sida loo sameeyo. Iyada oo taa maskaxda lagu hayo, halkan waxa yaal midhadh fikrado ah oo ku saabsan sida duruustaa loo isticmaalo.

1. Soo ban-dhig layliga nafta-qiimaynta oo weydii qof kasta oo ka mid ah ka qayb gelaya aqoon-isweydaarsiga inuu buuxiyo iyada. Qaybtan shirka ka mid ahi waa inay qaadato 20 ilaa 30 miridh.
2. Dib u shiri ka-qayb-galeyaasha oo ka abuur hab kooxeed dhibcayntii fardiga ee nafta qiimaynta. Abuur shax war-daabac ah sida aad ugu muujiso xogta adigoo isticmaalaya in yar oo farsamo wax curin. Taasi waa inay 15 miridh qaadato.
3. Weydii ka-qayb-galeyaasha inay isu kala qaybiyaan kooxo yar yar oo 3 ilaa 5 Qof ka kooban. Waajibaadyada la siiyey waa inay ku heshiiyaan tafsiirka shebekad-xidhiidhinta iyo inay dhaliyaan liiska istaraatijiyado shebekad-xidhiidhinta loogu isticmaalo tuul loo adeegsaado hawl-gallada Xidhiidhada dhex-mara Ururrada Aan Xukuumi Ahayn iyo kuwa Bulsho-ku-salleyda ah ee ay kala metelaan. U oggoolow qiyaastii ilaa 30 miridh.
4. Dib u shirsii koox hawleedyada oo weydii inay kaga war-bixiyaan liisaskooda Istaraatijiyadaha. Daba-gal ku samee qabashada dood lagu geba-gebaynayo shirka. (qiyaastii 30 miridh ah)

LIFAAQA 1: SHEBEKAD-XIDHIIDHKA: QIIMAYNTA HANNAANNADA QOFEED IYO KUWA URUREED

Naftaa qiimaynta aad immika ku hawl-gelaysaa waa wax gebi ahaantii aan cilmi ahayn, aan la soo jirabin oo aan caadi ahayn. Wararkuna waxay ku salaysan yihiin fikrado shakhsi ee laga qaatay qof dadka kale isla garteen inu yahay shebekad -xidhiidhiye hawl-kar ah. Waxa loo naqshadeeyey inuu keeno siiyo fursad lagu ogaado waxa aad ka aaminsan tahay iyo hab-dhaqankaaga ku saabsan shebekad-xidhiidhinta ee ku salaysan kuwa kale waxay ka qabaan.

Marka aad dhammayso weydiimaalaha waxa lagu weydiin doonaa inaad xisaabiso dhibco u taagan isugeynta guud ee jawaabaha laga bixiyey su'aalaha goonni goonnida ah.

Hab-socodka dhibcaynta waxay ku salaysan yihiin qiyaasta toddobada qodob ee soo socda: iyadoo 1 tahay waxaan dhici Karin iyo aan caqli-gal ahayn; 4 iyada oo ay wax ka run ahi jiraan hadalkan, kuma aamminayo inaan marka xiga lacagtaydu ku bixiyo sidaa, 7 ay tahay HAA. Kani waa aniga iyo ururkayga! (ama qaar kale oo xaqiijin togan oo ku saabsan fikradda laga qaatay) Xor u ahaw inaad ku isticmaasho nooc kale lambarrada ah 2,3,5 iyo 6 si aad usii fasirto una sii jilciso jawaabahaaga. Haddaba, odhaahaha waxa ay ku qoran yihiin qofka 1aad si deriska looga dhigo wax aad ugu saabsan shakhsi.

QIIMAYNTA HANNAANNADA SHEBEKAD-XIDHIIDHINTA QOFEED IYO KUWA URUREED

- 1. Shebekad xidhiidhintu waxay ururkayga ku caawin doontaa inu waxtar iyo hawlkarnimo kaga guul gaadho waajibaadkiisa.**

1	2	3	4	5	6	7

- 2. Waxan rumaysanahay in dhibaato kastaa xal leedahay.**

1	2	3	4	5	6	7

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

3. Had iyo jeer diyaarbaan u ahay marka dad ii baahdaan.

1	2	3	4	5	6	7

4. Ma noqon qof 9 ilaa 5 ah adigoo isla markaana aad sheegato inaad tahay shebekad-xidhiidhiye.

1	2	3	4	5	6	7

5. Shebekad-xidhiidhinta waxaad kaga fiicantahay keliya waxa aad ku biiriso aqoonta cilmi iyo horumarinta kuwa kale.

1	2	3	4	5	6	7

6. Waxaan jecelahay inaan ka dhex shaqeeyo xayndaabka nidaamka rasmiga ah si shaqooyinku iigu qabsomaan.

1	2	3	4	5	6	7

7. Waxan isku dayaa inaan ugu yaraan hal xidhiidh oo shakhsi kala samaysto hay'adaha aan la shaqeeyo.

1	2	3	4	5	6	7

8. Shebekad-xidhiidhintu waxay ku tacalluqadaa qaybsiga awoodda iyo khayraadka.

1	2	3	4	5	6	7

9. Waxaan u arkaa xaalad kastaa inay ii tahay fursad aan wax ku barto.

1	2	3	4	5	6	7

10. Uma arko wax I khuseeya awoodda iyo amarka kuwa aan la shaqeeyo.

1	2	3	4	5	6	7

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

11. Hawsha qayb beesha ka mid ah laga qabtaa waxay aakhirka kicin doontaa xayndaab weligii sii ballaadha oo wada macaamilo.

1	2	3	4	5	6	7

12. Shebekad xidhiidhintu waa xidhiidh qof iyo qof ah ee ma aha geeddi urur iyo urur ka dhexeeya.

1	2	3	4	5	6	7

13. Had iyo jeer waxa aan isku dayaa inaan soo saaro waxa tan ugu jira qofka kale ee uu u galaa.

1	2	3	4	5	6	7

14. Aniga ima niyad jebiyaan fashalladu ee waxbaan ka bartaa oo ayaan halkaa ugassii wadaa.

1	2	3	4	5	6	7

15. Caqabadda ugu muhimsan shebekad-xidhiidhintu waa inaan fahmo baahiyaha dadka kale si an uga jawaabi karo.

1	2	3	4	5	6	7

16. Waa muhiim inaad lahaato xorriyad inaad ku fashilanto marka aad ku hawl-gelayso shebekad xidhiidhin.

1	2	3	4	5	6	7

17. In cid la wadaago aqoontayda iyo waaya-aragnimadayda waxay albaabada u furtay aqoontii iyo waaya-aragnimadii kuwa kale.

1	2	3	4	5	6	7

18. Waa muhiim inaan dhisno awoodda kuwa aan la yeelanayno shebekad-xidhiidho.

1	2	3	4	5	6	7

19. Axaan eegtaa dad aad shebekad-xidhiidh la yeelan karo oo leh awood micne leh iyo kuwo saamayn arrimaha ku leh.

1	2	3	4	5	6	7

20. Shebekad xidhiidhintu ma aha geeddi-socod kor lagasoo maamuli karo ama laga ilaalin karo.

1	2	3	4	5	6	7

Dhibcaynta Fikradaha

Labaatanka odhaahood ee weydiimaalaha qiimaynta waxa ay u qaybsan yihiin qiyaas ahaan odhaaho shakhsiyeed oo ku saabsan falsafaddaada gaar ahaaneed ee hawl-galka iyo kuwa qalabkaada shebekad xidhiidhinta, iyo odhaaho guud oo ku saabsan hab-socodka oo khuseeya ururrada iyo beelaha. Daqiiqado yar qaado oodabeed isugu dar dhibcayntaada sida so socota:

Su'aalaha **2, 3, 6, 7, 9, 10, 13, 14, 17, 19.**

() **Dhibcayntii shakhsi ee wax-ku-oolnimada shebekad-xidhiidhintayda**

Su'aalaha **1, 4, 5, 11, 12, 15, 16, 18, 20.**

() **Fahamkayga Hab-socodka Istaraatejiyad hawlgal urur ahaan**

Dhibcaha Shakhsi_____ lagu daro Dhibcaha Urur_____ =Dhibcaha Guud_____

Mid kasta oo labada qaybood ah, isugeynta guud ee dhibcuhu waa 70 bun(7 X 10). Haddii isugeyntaada dhibcaha caynadda shakhsi ay tahay 50 ama ka badan, nasiibku waxay sheegayaa in aad tahay shebekad-xidhiidhiye wax-ku-ool ah.Haddii warbixinta dhibcaynta caynadda guud ay noqoto 50 bun ama ka badan, waxay muujinaysaa inaad wax badan ka fahamsantahay dabiicadaha u muhiimka ah shebekad-xidhiidhintu in ay u tahay istaraatejiyad hawl-gal oo wax-ku-ool ah heykal habaysan dhexdiisa.

Waajib-horumarineedka lasoo jeediyey: Haddii mid uun ka mid ah dhibcaha gaar ahaanteed ee caynadda shakhsi ay noqoto 4 bun ama wax ka hooseeya, waxa dhici karta inaad rabi doonto

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

inaad ka fikirto iyaga wax ku saabsan iyo sidii aad ugu dejin lahayd qorshe-hawleed kugu caawin kara sidii aad hore ugu marin lahayd qaybtan falsafaddaada iyo xirfaddaada shebekad-xidhiidhinta.

Warqad qorshayneed ayaa lagugu siiyey bogga soo socda fududayntaada awgeed. U samee nuqullo dheeraad ah mid kasta oo ah qorshe xirfadeed la horumarinayo oo siyaado ah.

QORSHAHAYGA SHAKHSI AHAANEED EE WAX-QABADKA SHEBEKAD-XIDHIIDHINTA

(Ku buux-buuxi hal qaab tallaabo kasta oo horumarin xirfadeed ah oo qorshaha kuugu jirta)

Magaca _____
Taariikh _____
E-meylka _____

Xirfadda shebekad-xidhiidhinta ii qorshaysan inaan immika ku shaqeeyo, waa:

Tallaabooyinka cayiman ee aan qaadayo si aan u horumariyo xirfaddan waa:

Hantida aan u baahan doono si aan u gaadho una waariyo heerkann cusub ee hawl-karnimada shebekad-xidhiidhinta waa: (Tan waxa ku jiri kara saaxiib caawiye ah, macallin, tababar dheeraad ah iwm).

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

Qorshahayga aan ku qiimaynayo guulaysiga wax-qabadyadani, waa:

QALABKA 5: DIB-U-EEGIDA TII U FIICNAYD IYO TII U XUMAYD WAQTIYADAADII SHEBEKAD XIDHIIDHINTA

Ujeedooyinka barashada: In loo siiyo ka-qayb-galeyaasha fursad ay ku qiimeeyaan dhacdooyin cayinnaa oo nololahooda soo maray ee ay la kulmeen dedaalo ay guulaysteen iyo qaar ay guul-darraysteen ee ku tacalluqay istaraatejiyadaha iyo xirfadaha shebekad-xidhiidhinta.

Waqtiga Loo baahan yahay: Hal ilaa laba saacadood oo ku xidhan hadba inta uu dhan yahay waqtiga aad ku isticmaashay isku duwidda waaya-aranimooyinka mid kelidii.

HAB-SOCODKA

1. U qabo dood jihaysan oo gaaban oo ku saabsan shebekad-xidhiidhinta si aad ka-qayb-galeyaasha oo dhammi u wada fahmaan hab-socodka. Waxa ku jira metaallo fara badan qaybta hore ee buug-hawleedka haddii aad uga baahato tixraac dheeraad ah oo aad doodda ku socodsiiiso.
2. Weydii ka-qayb-galeyaasha inay isu kala saaraan kooxo yaryar oo saddex saddex ama afar-afar qof ah oo u dir hawsha soo socota: Waajibaadkiinnu waa inaad kusoo noqotaan waqti qiyaastii saacad ah idinka oo sida metaallo ku saabsan dedaallo lagu guulaystey iyo kuwo aan si aad ah loogu guulaysan oo shebekad xidhiidhinta ah iyo sababihii loogu guuleystey ama loogu guul-darraystay waxay ahaayeen.
3. Ka dib marka aad dib u shiriso kooxo hawleedka, weydii inay warbixino ka dhiibaan xaaladihii ugu xiise weynaa koox walba iyo sababihii keenay inay guulaystaan ama aanay u guulaysannin.
4. Kusoo geba-gebee fadhiga adiga oo aloosaya liis soo jeedinno ah oo ku saabsan shebekad-xidhiidhinta sida, shebekad-xidhiidhiyeyaashu waxay ugu farxad badan yihiin marka ay dad kale caawinayaan. Sida ay tahay shir kastoo ah dood fikrad curin ahi, kuma jiraan fikrado qiimayn, iyaga oo aan loo kala eegin sida kastoo ay u kala bilaa micnaysan yihiin. Ka filo faallooyinka qaar inay bilaa micne noqdaan. Sidaasoo ay tahay, haddana, shebekad-xidhiidhinta runtii waa wax aan rasmi ahayn oo shakhsiyeed iyo geeddi-socod maarayneed.

ADEEG 6:

DHISIDDA ISBAHAYSIYADA ISTARATEJIYAD KU DHISAN

Ujeedada Barasho: Fadhigan waxa loo dejiyey si loo kordhiyo ka qayb galeyaasha fahamkooda iyo xirfadahooda si ay u ogaadaan una dhisayaan isbahaysiyada istaraatejiyad ku dhisan.

Waqtiga loo baahan yahay: Ilaa qiyaastii laba saacadood

HAB-SOCODKA

1. Ku fur fadhiga dood gaaban oo jihaysan oo ku saabsan isbahaysiyada istaraatejiga ah kuna salaysan fikradihii Cutubka 2aad: Qyabtiisa 1aad ee buug-hawleedkan.
2. Adiga oo isticmaalaya afarta qaybood ee isbahaysiyada lagaga soo hadlay Cutubka 2aad, cinwaankiisuna yahay *Qaybaha Isbahaysiyada*; weydii ka-qayb-galeyaasha inay dhacdooyinkii noloshooda iyo aqoontooda metaallo ku saabsan mid waliba kusoo taxo warqad daabacaadeed si loo haysto qoraal kooban oo metaallada ku saabsan. Afarta qaybood waxay kala yihiin: ***Iskaashiyo Egman, Iskaashiyo is u dhalad ah, Iskaashiyo dano khuseeyaa kulmiyaan, Iskaashiyo La-helow ah.*** Qaybta ugu dambaysaa waxa ku jira kuwa iyagu ay aad u badan tahay inay kusoo dhasheen sife fursad nasiib halkii ay ku dhalan lahaayeen ku talo-gal qorshaysan. Haddii tilmaanta ereyga Iskaashi uu ka leeyahay dhulka aad dunida ka deggan tahay micne cabbiraya nuqsan, ku magacaw xidhiidho rasmi ah ama u bixi kasta oo kale oo la oggol-yahay.
3. Iyaga oo ku salaysanata metaallada, ku amar ka-qayb-galeyaasha inay curiyaan liis qoran oo ku saabsan sababihii loo abuuray ururrada iyo wixii keenay inay najaxaan.
4. Kusoo gebagebee fadhiga hadal sharax ah iyo dood gaaban ah oo ku salaysan siddeeddii Aay "8 l's" ee Kanter iyo toddobadii Sii "7 Cs" ee Austin ee lagaga soo hadlay dhammaadkii Cutubka 2aad: qaybtiisa 1aad ee buug-hawleedkan. ku xidh Dariiqooyinkaa metaalladii ay bixiyeen ka-qayb-galeyaashu.

Waxa kale oo jira dhawr siyaalood oo kale oo loo cuskado si loo gaadho ujeedada barashada ee kor lagu soo sheegay.

QALABKA 6A

Haddii ay ka-qayb-galeyaashu karayaan inay dood isbahaysiyada ururkooda wadaagaan, weydii ka-qayb-gale walba inuu ku dul sameeyo khariidadda isbahaysigooda warqad. U jeedi inay goobo ku sawiraan warqadda badhtankeeda, taasoo u taagan midba ururkiisa iyo goobooyin kale oo yaryarna ay ku sawiraan goobaanka ku wareegsan oo ururrada kale u taagan. Ku dhiirri inay ururradaa isku xidhaan midba ka kale iyo koodaba haddii xidhiidhyo kale ay micne leeyihiin iyo haddii ay saamayn ku leeyihiin isku xidhkii asaasiga ahaa ee ay hore usoo curiyeen. Waajib kale oo loogu kordhinayo layligii fududaa kharridadda, haddii aad waqti u hesho, wuxu noqon doonaa inaad weydiiso ka-qayb-gale walba inuu taxo sababta/aha isbahaysi u jiro iyo inuu fasiro sababaha iyadoo laga eegayo dhinaca wax-is-dhaafsiga. Si kale haddii loo dhigana, maxaa dhinac kasta oo isbahaysiga ka mid ahi uu ku qabaa cilaqaadkan oo ku kallifta inuu sii wado ku jiriddiisa?

Ka-qayb-gale walba si fursad uu kaaga hadlo shebekad xidhiidhka ururkiisa/eeda iyo khariidadda isbahaysi iyo faa'iidada xidhiidhadaa leeyihiin? Ku xidh fadhiga weydiinta ka qayb-galeyaasha haddii ay hayaan wax fikrado ah oo ku saabsan isbahaysiyo cusub oo ay curin lahaayeen oo ku salaysan doodan.

QALABKA 6B

Dariiqadani waa diraasad xaaladeed gaaban oo laga sameeyey carruurta jidka

1. Soo jeedi daraasad xaaladeedda gaaban ee so socota iyada oo ay weheliyaan qaar ka mid ah mabaadi'da loo sameeyo isbahaysiyo, haddii uu kani yahay layligii u horreeyey waxaad qorshaysaa inaad isticmaasho geeddi-socodkii samaynta isbahaysiyada istaraatejiga ah.
2. Samee kooxo hawleed mid walba yahay 4 ilaa 7 qof iyadoo aad ku xidhan hadba tirada kasoo qayb-galeyaasha aqoon-is-weydaarsigaaga. U sheeg unay akhriyaan diraasad xaaladeedka si ay u abuuraan liisto ururro, wakaalado, kooxo iyo shakhsiyo ay rumaysan yihiin inay waxtar u yeelan doonaan iyo kuwa ay caqli-gal tahay inay gaadhaan yoolalka lagusoo carrabbaabay diraasad xaaladeedka, iyo inay caddeeyaan sababayntooda arrimahaasi.
3. Kooxaha sii waqti 45 daqiiqo ah si ay u sameeyaan liis ururro ay la yeelan lahaayeen isbahaysiyo iyo sababayntooda mid walba. Ku muuji inay dhici karto inaanay haysan xogtii ay u baahnaayeen iyo inay u baahan doonaan inay sameeyaan fikrado metaallo ah ooku saabsan is-kaashiyadooda ay soo jeedinayaan oo ku salaysan khibradahoodii shaqadii heer beeled.
4. Dib u shirsii kooxaha oo weydii iyagu inay kasoo war-bixiyaan. Ku khatin fadhiga abuuridda liiska Mabaadi'da u baahan loo cuskado haddii la rabo inay is-bahaysiyadu guulaystaan iyo inay raandhiis waara yeeshaan.

LIFAAQA 1: DIRAASAD-XAALADEED: DHISIDDA IS-BAHAYSIYO SI LOO BADBAADIYO KOOXDA QASHIN QADHAABADKA

Mid kasta oo idinka mid ah, isagoo ah xubin kooxdan ka mid ah, wuxu kasoo qalin-jebiyey jaamicadda maxalliga ah isagoo kusoo qaatay takhasus ama horumarinta ubadka ama waxbarshada dugsiyada hoose. Marka hore waxaad isku wada barateen shaqo aad ka wada gasheen Adeegga Qashinka ee magaalo maxalli ah. Waxa idin qiiro-geliyey wixii aad kala kulanteen intii hawshaasi socotey. Maanka kumaydaan haynin inay jirto carruur yaryar oo ka shaqaysata inay qashinka ka dhex baadhaan bal inay ka helaan wax in uun qiime ugu yeelan kara oo ay iibiyaan si ay ugu noolaadaan. Aad bay idiin argagax-gelisey carruurtaasi, idinka oo aqoonsaday inay yihiin carruur fekeraysa oo wax- abuur leh hase yeeshee ay caddahay inay marayaan dariiq kusoo oodan oo aan lahayn fursado ay wax-barsho ku heli lahaayeen ama ay kaga bixi lahaayeen xaaladda fiqiirnimo ee ay iska dhex arkeen iyagoo ku dhex haftay.

Intii uu socotey hawshii goobtu, waxa midkiin waliba go'aansaday inuu damco sidii uu wax uga qaban lahaa kaalmaynta carruurtaasi, halkii habkii soo jireenka ahaa ee shaqo raadis ka geli lahaa. Waxaad go'aansateen inaad bilawdaan Urur Bulsho-Sal-leh ah si uu ula shaqeeyo carruurtaada iyo inuu dhugmada saaro dejinta barnaamijyo wax-barasho oo aan ahayn habkii-soo-jireenka ahaa. Waqtiga xaadirka ah ma haysataan wax khayraad ah oo aan ahayn niyaddiinna, heellanaantiinna iyo aqoontiinna Horumarinta Wax-barashada Carruurta. Ka dib markaad isu diiwaan-geliseen Urur Bulsho-ku-sal-leh ah oo ku wajahan Kooxda Qashin-ka-qadhaabadka, waxa ururkiinna bulsho-ku-sal-leh xidhiidh la sameeyey oo ay isku xidhmeen Hay'adda Badbaadada Carruurta, oo ah Urur Caalami ahoo aan Xukuumi ahayn. Hay'adda Badbaadada Carruurta waxay idiin muujisay inay idinka caawin doonto xagga farsasmada laakiin aanay huraynin inta ka horraysa is-bahaysi aad la gashaan ururro maxalli ah iyo kuwo kale oo ku caawin kara in ururkiinnu bulsho-sal-ku-leh gaadho yoolka ah furitaanka iyo hawl-galka dugsi aan ahayn habkii soo jireenka ahaa oo carruurtaasi leedahay.

Halkan waxa kuu yaalla wixii aad xaaladda ka og-tihiin. Waxa jira 23 carruur ah oo ah da'da u dhaxaysa 9 ilaa 15 jir oo aad u tilmaansatay inay noqdaan ardada dugsi hoos taga Qorshe waxbarsho aan ahayn soo-jireen oo rajaynaysaan inaad isku-dubbariddaan. Maamulka qashin-qubka magaalada waxa qandaraas ku haysata shirkad maxalli ah oo ku shuqul-leh adeegyada qashinka magaaloooyinka waaweyn ee dalka inta badan. Xidhiidho siyaasadeed inkasta oo ay lahaayeen, laakiin haddana, waxa weerar culusi kaga yimid dhowaan sida ay ugu oggolaadeen in carruurta derbiyadu ka qadhaabato goobaha qashin-qubka oo ay ka urursadaan alaabooyin dib loo warshadayn karo. Alaabooyinkaa waxa laga iibiyaa dhawr shirkadood oo ay ku jirto shirkad caalami ahoo dib u sancaysa tiimanka jaandiga ah iyo waxyaalo kale oo biraha la xidhiidha. Carruurtaasi waxay u hoydaan gabbaad ay magaaladu leedahay oo u dhow goobta qashin-qubka waxaanay lacag fiican kaga bixisaa KOT Guri weyn. Carruurta iyagaa ka mas'uul ah baahiyahooda nololeed oo dhan.

Maxadadda Tilifishanka maxalliga ah ayaa hadda kooxdii kala yeelatay waraysi ku saabsan qorshihii, oo jawaabtii ugu horreysey baaqii aad jeediseen ay idiinka timid Maamulka Tacliinta Magaalada oo idinkaga cabanayey inaydaan xaq u lahayn inaad faro-gelisaan arrimaha

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

Wax-barashada. Taasi waa Maamulkooda! Waxa kale oo ay qireen in aanay jirin wax ka qabana doonaan sidii loo caawin lahaa carruurtaasi, maa daama ay waaxdoodu ku jirto waqti adag oo ay ku hawlan tahay adeegidda carruurta mas'uulka ah, sidii uu daboolka uga qaaday wakiilka waaxdu.

Kooxdinna way ka go'an tahay inay bilawdo barnaamijyada, laakiin, waxaad u baahan tihiin shuraakeyaal. Waajibaadkiinnu waa in aad samaysaan liiska ururro, kooxo iyo shakhsiyaad aad rumaysan tahay inaad u baahan doonto inaad la gashaan is-bahaysi istaraatejyadeed si aad ugu furtaan una hawl-gelisaan barnaaminkiinna cusub ee wax-barasho ee ahayn soo-jireenka carruurtaasi. Sheeg waxa aad ugu baahan tahay iyaga iyo waxa iyaga ugu jira inay ka qayb-qaataan. Dariiqadaa ugu dambaysaa waa lagama maarmaan. Mabaadi'da wax is-dhaafsigu waxay tidhaa, wax aad ku heli kartaa ma jiraan adduunyadan adiga oo aan waxba hurin.

QALABKA 7: QIIMAYNTA SHURAAKEYAASHA MAANTA

Adeeggan waxa loogu talo galay inu ka caawiyo maareeyeyaal Ururro Aan Xukuumi Ahayn iyo Ururro Bulsho-ku-sal-leh qiimaynta shuraakeyaasha waqtiga xaadirka ah iyo barasho dheeri ahoo ku saabsan yagleelidda isbahaysiyo cusub. Waxa loo isticmaali karayaa sida nooc waaya-aragnimo wax-barasho oo iskaa-wax-u-qabso ah, oo micnaheedu yahay in Maareeye iyo kooxda/deeda ay dhex maraan hab-socodka iyada oo aanu kaalmaynin fududeeye amaba waxa lagu isticmaali karaa adeeg ahaan dhismaha kooxeed ama talada horumarinta urureed ama inuu qayb ka ahaado maaraynta aqoon-is-weydaarsi gacan-lagu-hayo. Xulashadu adigaa iska leh, ta aad u qaadnayso.

Ujeedooyinka barasho: In la qiimeeyo hal ama ka badan oo shuraakooyinka aad ku jirtid ka mid ah iyo abuuridda qorshe ama aad kusii xoojinaysid ama ku baabi'inaysid oo ku salaysan heerka ahmiyadda iyo adeegidda ay u leeyihiin ururkiinna egmadeyaashiinna iyo dheefsadeyaasha adeeggiina.

HAB-SOCODKA

Haddii aad tahay Maareeye Urur Aan Xukuumi Ahayn ama Urur Bulsho-ku-Sal-leh ah oo aad goosatay inaad qabato qiimaynta, waxaan talo kugu siinaynaa in aad ka fikirtid inay kula qabtaan mudanka shaqaalahaaga qaarkood ama qaar ka mid ah xubnaha Guddigiinna. Habka waa lagu sii dejiyey si uu kaaga caawiyo inaad qiimayn ku samayso wax ka badan shirkad qudha ama hal is-bahaysi keliya markiiba adiga oo adeegsanaya dariiqada si xulasho ah looga so qaatay Liisaska Kanter iyo Austin ee ku yaalla dhammaadka Cutubka labaad : Qaybta 1aad ee buug-hawleedka OO. Waxa lagu kordhiyey dariiqooyin kale oo ku salaysan waaya-aragnimada buug allifaha ee ku saabsan qaybtan muhiimka u ah dhinaca hay'ad dhiska.

Qiimaynta Isbahaysi-shuraakaw kasta oo muhiim ah oo uu ururkiinnu xaadirka ku lug leeyahay, waxa daba socota rabdado ah su'aalo qorshayneed ah. Waxa iyaga loo naqshadeeyey inay adiga kaa caawiyaan sidii aad ugu fikirayso isbeddello dhici kara inaad ku samaysid isbahaysiyadaada istaraatejiga ah ee xaadirka iyo dedaal aad u gashid samayn qaar cusub.

Is-bahaysi Istaraateji ah waxa lagu sharxaa inuu yahay mid leh isku tiirsi iyo is-xilqaan ilaa xad ah si loo fuliyo hawlo wada-jir ah oo u adeega macaamiisha iyo egmadeyaasha oo labada dhinacba muhiim u leh. (Iyada oo la aqoonsan yahay in Is-bahaysiyo badan ay ku wada jiraan in ka badan laba dhinac, ma aha wax lagu taliyo in la isugu geeyo ururro badan mid qudha ujeedooyin qiimayneed aawadeed. Haddii aad haysatid is-bahaysiyo dhinacyo badane ah, ku qiimee cilaacaadyada mid mid uga dhexeeya gaar ahaantood, ka hor inta aanad qiimaynin sawirka weyn ee wadareed.)

Aalad qiimayneedda soo socota waxa ku jira laba raso oo macluumaad. Khaanadda qotonta ee bidixda waxa ku qoran weedho sharxaya dabiicadaha cayiman ee is-bahaysi wax-ku-ool ah. Gudubka dusha ee shaxda waxa ah khaanado madhan oo lagu qorayo magacyada shuraakeyaashaada ugu muhimsan ama is-bahaysiyo istaraateji ah. Khaanadaha is-ka taltallaaba waxaan soo jeedinaynaa in aad ku qortaan lambarrada u dhexeeya 0 ilaa 10 oo u taagan qiyaastaada u fiican ee tayada wejigan ay leedahay shuraakenimadu.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- **Dhibcaynta 0** waxay muujin kartaa inaan loo haynin wax caddayn ah in sifahaa ka jirto shuraakaha dhexdiisa iyo inay waajib tahay in laga takhaluso.
- **Dhibcaynta 10** waxay muujin kartaa in sifahaasi shuraakenimo ay tahay wax aan si ka wanaagsani jirin.
- **Dhibcaynta 5** waxay muujin kartaa in sifahaasi shuraakenimo ay tahay wax la xammili karo laakiin aan caafimaad qabin, sidaa awgeedna u baahan in lala socdo.
- **Dhibcaynta u dhaxaysa 1 ilaa 4** waxay muujin kartaa in sifahaa shuraakenimo uga baahan tahay dhugmo labada dhinacba. Marka ay dhibcuhu sii yaraadaanba, waxa sii badata sida baahidaasi u tahay degdeg.
- **Dhibcaynta u dhaxaysa 6 ilaa 9** waxay muujin karaysaa in sifahaa shuraakenimo ay waxtar togan u leedahay baahidii la isla qaatay ee wada shaqaynta. Marka dhibcuhu sii bataanba waxa sii weynaada waxtarka waxaana sii yaraata baahidii ahayd in waqti lagu lumiyo ka werwerkeeda.

Adeegso fikraddaada ugu wanaagsan ee dhibcaynta mid kasta oo sifooyinka ay leedahay shuraakenimadu adigoo isticmaalaya lambar u dhexeeya 0 iyo 10. Kaga biiri dhibcayntaada khaannad kasta oo qoton ah xagga hoose si aad u heshid isugeyn dhibcood oo sharxaysa tayada shuraakenimada. Isugeynta dhibcayntu waxay kugu caawin doontaa in aad aragtid waxa mid kasta oo shuraakeyaashaada ka mid ah heerka derejadiisu tahay marka la barbar dhigo kuwa kale ee la qiimaynayo. Waxa kale oo ay fikrad guud kaa siin doontaa heerarka ay kala tahay caafimaad-qabka shuraakuhu. Laakiin dhibcaynta gaar-gaarka ahee adiga iyo kuwa kale waxay u taagan yihiin sifooyinka midkiin kasta ee shuraakenimada inay yihiin kuwa ka bixiya tibaaxaha qiimaynta lagu hagaajinayo guud ahaan cilaaqaadyada is-bahaysiga ka hor inta aanay dhibaato keenin.

Qodob gebagebo ahoo ku saabsan hab-socodka qiimaynta: Iyadoo ay qiimayntaada fardi ahaaneed ay faa'iido u leedahay helitaanka xaaladda guud ee shuraakenimada, waxaan idinku dhiirri-gelinaynaa inaad tix-gelisaan sidii aad u heli lahaydeen xubnaha furaha u ah ururka shuraakaha tihiin inuu dhammays-tiro buux-buuxinta weydiimaalaha iyo weliba mudanka dano-wadaagyada aqoon ku filan oo aad ah u leh cilaaqaadyada ururrada iyo shuraakeyaashu inay sameeyaan qiimayn sugan.

Ka dib marka la dhammays-tiro qiimaynta, midkood sii inuu soo koobo xogtii wadareed oo uu ka jeediyo fadhi-hawleed ay u dhan yihiin labada kooxo-maarayneed. U tix-geli fadhigan xog-wadaag inuu yahay gun-dhigga sida la isugu dubba-ridayo qorshe-hawleed haddii ay jiraan masalooyin sife oo u baahan digtoonaa. Haddii xogta dhammaan wada togan tahay, u dabbaal-dega guushiinna shuraakaynta.

Marka ay tahay wax khuseeya warqad hawleedka soo socota, haddii ay jiraan in tirada ururrada aad la leedihiin is-bahaysi istaraateji ah ay afar ka badan tahay, isticmaal shax kale.

LIFAAQA 1: FARSAMO-QIIMAYNEEDDA SIFAHA SHURAAKANIMO

Dariiqada fasirka Sifaha Shuraakenimo / Magacyada Shurkeyaal istaraateji ah

Fikradaha iyagu fasira xidhiidhinta	1. _____	2. _____	3. _____	4. _____
1. Qasdi cad oo ku saabsan sababta ay ujirto shuraakenimadu.				
2. Iswaafaqa waajibaadyada, istaraatejiyadaha iyo qiyamta shuraakeyaasha.				
3. Labada shuraake oo xooggan oo mid waliba wax qiime leh kusoo biiriyo is-bahaysiga.				
4. Cilaaqaadka oo muhiimad u leh labadooda shuraakeba.				
5. Shuraakeyaasha midba ka kale u baahan yahay garashada inaanu keli qaban Karin waxa ay shuraakenimada ku qaban karaan.				
6. Shuraakenimadu qiimay u kordhisaa beesha weyn oon la heleen hadday keli shaqeeyaan.				
7. Xog iyo fikrado ayay si baahsan wadaagaan ururrada, maareeyayaasha iyo shaqaalaha dhexdooda.				
8. Waxa jirta darbanaansho joogto ah oo heer kasta ah ee barashada urradooda.				
9. Dhinacyada shuraakuha waxay u darban yihiin waarinta shuraakenimada ilaa muddo.				
10. Waxa jirta is-aaminsanaan heer sare ah oo ka dhexaysa ururrada, maareeyayaasha iyo shaqaalaha.				
Isu-geynta dhibcaynta shuraake walba.				

Dhibcaha ugu badan ee shuraakenimo heli kartaa iyadoo la isticmaalayo habkan dhibcayntu waa 100. Haddii mid uun ka mid ah isugeynta dhibcahaagu ay noqoto 90 ama wax ka sarreeya, waxay muujinaysaa in labadiinna ururba u heellan yihiin is-bahaysiga isla markaana heellanaantaasi lagu daryeelayo wax-qabadyo kala duduwan. Rajo weynidu waa in aad weydiisey

***DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU
SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED***

ururka aad shuraakoobaysaan inuu isna sameeyo qiimayntan. Haddii qiimayntoodu aad uga duwanaato tiinna; sida dhibco 60 ah ama wax ka hooseeya, markaa waxa jooga waqtigii la qaban lahaa xaqiiqo hubin si loo arko maxaa ugu wacan inay fahamyadu sidaa u kala fogaadaan.

Xaaladaha sidan oo kale ah, waa muhiim in la is-barbar dhigo dhibcaha sifooyinka fardi ahaaneed ee fasira cilaqaadyada wax-ku-oolka ah.

LIFAAQA 2:

QORSHAYNTA HORUMARIDDA SHURAKOOBID MIDHO-DHAL AH

Innagoo lagasoo qaadayo in dhibcuhu ka yara waabsan yihiin 90kii hadda laga dooday ee malaha ahaa, halkan waxa yaal waxyaalo la qaban karo si loo sii hagaajiyo cilaaqaadka shuraakoobidda. Haddii aad ama dhammaysay qiimayntan is-ahaantaa adigoo ka mid ah maareeyayaasha Ururrada Aan Xukuumiga Ahayn ama Ururrada Bulsho-ku-sal-leh ee shuraakoobaya amase ay kaa tahay dedaal ah in aad ogaatid sida aad u aragto cilaaqaadka, hadda waxa jooga waqtigii aad kuwa kale ku marti qaadi lahayd inay kaala soo qayb-galaan hab-socodkan. Halkan waxa kuu yaalla fikrado dhawr ah oo ku saabsan daba-galka.

1. Fursadda qiimayneed kala dood hoggaanka ururka aad shuraakoobaysaan oo weydii inay kulasoo biiraan kooxdiiinna maaraynta fadhi-hawleed qiimayn iyo dib-u-eeggid ah oo maalin dhan qaadanaya.
2. Ka soo qaad inay aqbalaan iyo in aad u degteen Hudheel maxalli ah ama Xarun Shirar fadhigiinna, ku bilaw sharaxaadda waxay tahay sababta aad dib u eegiddan shuraakenimada ugu malaynayso inay muhiim tahay iyo waxa aad ka rajaynayso inaad ku gaadhid. U deji himilooyin iyo rajooyin qaarkood lagu wada heshiiyey oo caqli-gal ah hawlaha maalintaa ka dibna bilaw qorshaynta.
3. Ka-soo qayb-gale kasta u dir inuu dhibceeyo weydiimaalaha qiimayneed kuna wada naqil dhibcaha keli-kelida ah ee warka dariiqo kasta waraaq weyn ama warqadda roganta. Waxa kale oo aad ku raacisaa ururrinta isu-geynta guud ee dhibcaha. U soo saar isku-celcelinta dhexe ee dhammaan dhibcaha odhaahda sife kasta iyo isu-geymaha adigoo isu geynaya dhibcaha keli kelida ah una qaybinaya isu-geynta guud tirada dhibcaynaha keli-kelida.
4. Dhammaan sifooyinka hela isku-celcelin dhexe oo ka badan 70 bun, ku qor sifooyinkaasi warqad cad dusheed una cinwaan bixi *Sabab loo dabbaal-dego* ama wax aad uga midho-dhalsan si aad u bayaamiso guulahaaga.
5. Dhammaan isku celcelinta dhibcaynta sifooyinka shuraakenimada fardi ahaaneed ee ku dhaca 50 bun wax ka hooseeya, isugu xigsii derejada adiga oo kasoo tirinaya sifaha ugu hoosaysa oo ku qoran liis aad ugu magac dartay wax u eg *sababta werwerka*. Kani waa liiska aad dib ugu noqon doonto marka dambe sababo qorshayn iyo go'aan qaadasho oo micne leh awgood. Laakiin inta aanad sidaa falin, waxa dhici karta inuu jiro arrimo kale oo laga yaabo inaad u baahan doonto inaad isku taxallujiso.
6. Taasi waa meesha ay kasoo bixi karaan faraqyo la taaban karo oo dhexeeya fahamka ku saabsan caafimaad-qabka shuraakooyinka ay ka qabaan shakhsiyaad ka qayb-galay geeddi-socodkii qiimaynta. Haddii ay runtii ay jiraan faraqyo muuqdaa oo u dhexeeya qaar uun ka mid ah dhibcaynaha, waxa muhiim ah in wax laga qabto faraqyadaas ka hor inta aan ku dhaqaaqin xallinta dhibaataada. Metelan, koox ka socota urur ayaa waxay heshay dhibco isku-celcelin dhan 43 oo ay ka heshay heerka is-gaadhsiinta labada urur ka dhexaysa (Sifaha 7) iyo kooxda kale oo isku celcelinta dhibcahoodu yihiin 89. Marka ay fahamyada sidaa oo kale u kala tagsani jiraan waxa taagan waqti la qaban lahaa wada hadal furan oo ku saabsan

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

shuraakooyinka guud ahaan, ka hor inta aan lagu tallaabsan dhibaato xallinta. Ku qaado qadder waqti ah oo aad kaga hadashaan maxaa ugu wacan inay fahamyada koox kastaa si aad ah u kala duwanaadaan.

7. Dooddan ka dib, haddii loo baahdo, ku noqda liiskii sababtii werwerka oo isku shuqli hawlo baadi doonka, falanqaynta iyo dariiqo xal u helidda dhibaata. Ka bilaw dariiqada dhibcaynta ugu hoosaysa oo ka dhex shaqee liiska ilaa labada kooxoodba ay ku qancayaan natiijada go'aannada hawl-galka.*
8. Kusoo xidh fadhi-hawleedka muujinta inay kaa go'an tahay sii wadidda wada hadalka iyo cilaaqaadka shuraakenimada.

*Caawimo faahfaahsan oo ku saabsan sida loogu hawl-gelayo qorshaynta ka-qaybgalka loo dhan yahay iyo shaqooyin go'aan qaadashada, waxaanu kuu tixraacinaynaa farsamooyinka faraha badan ee laga helayo *Buug-hawleedka Dhismaha Buundooyinka loo dhex-marro Qorshaynta ka-qayb-galka loo dhan yahay*. Waxa kale oo aad fiirisaa doodda ku saabsan iyo farsamooyinka ka hadlaya sheekada hab-socodka ee laga helayo *Buug-hawleedka Dhismaha Buundooyinka loo dhex-marro Maaraynta Colaadaha iyo Khilaafyada*. Labaduba waxay qayb ka yihiin Taxanahan Dhisidda Awoodda Ururrada Aan Xukuumiga Ahayn iyo kuwa Bulsho-ku-sal-leyda ah.

QALABKA 8^{AAD} :

KA HAWL-GALKA DHINACA AWOOD DAD KASBASHO

Ujeedada Barasho: In kor loo qaado aqoonta ka-qayb-galaha ee ku saabsan noocyada ilo awoodeed kala duwan ee u diyaara kobcinta dad kasbashada qof.

Waqtiga loo baahan yahay: 60 ilaa 75 miridh.

HAB-SOCODKA

1. U qaybi ka qayb-galeyaasha shan waraaqo tibaaxeed mid walba oo weydii inay ku qoraan mid walba hal erey ama weedh kusoo dhacda maskaxda isla marka aad maqashaan ereyga AWOOD! Xusuusi inay waraaq walba ku qoraan hal erey oo keli ah. Si aad uga hesho waxa ugu badan layligan, waa inay kuu diyaar ahaadaan waraaqaha iyo qalimmo calaamadeedku si aanu waqti kaaga lumaa u jirin inta ka dhaxaysa waraaqo siinta iyo qoridda shaqada aad siisay. Taasi waxay firaqo u siin doontaa waqti ay jawaab ku bixiyaan. Isla marka ay dhammeeyaanba, u dir inay derbiyada qolka tababarka waraaqahooda ku dhejiyaan, iyaga oo isku xigsiinaya kuwa ay ku qoran yihiin dhambaallo isku mid ah ama isu egi .
2. Qabo dood aad hagayso oo ku saabsan dhambaallada kaadhahka ku qoran, waaya-aragnimadoodii shakhsi ee ilaha awoodeed, iyo fahamka fikradaha ay ka qaateen Qaybta koowaad. Haddii aanad carrabbaabin siddeedda dariiqo ee ilaha awoodaha ku yaalla bogagga labaad iyo saddexaad ee Cutubka Afraad, tani waxay u noqon doontaa waqti u fiican oo lagaga doodo qaybahaasi ilo- awoodeed iyo in la barbar dhigo ereyada iyo hal-qabsiyada kaadhahka ku qoran.
3. Tallaabadani waxay ku tacalluqdaa weydiimaalaha is-qiimaynta ee ku salaysan siddeedda ilo awoodeed, sidaa awgeed bay muhiim u tahay inaad weydiiso hadduu jiro qof u baahan bayaamin iyaga ku saabsan. U qaybi weydiimaalaha qiimaynta iyo hal bog oo uu ku qoran yahay sharaxa ilaha awoodda ka dibna weydii inay buuxbuuxiyaan weydiimaalaha. Marka ay ka faraxashaan shaqadan, weydii kasoo qayb-galeyaasha in midba laba qof oo kale ama ka badan ay isu raac-raacaan si ay uga doodaan natiijooyinka qiimaynta. Waxaad siisaa koox-yar-yartaas waqti 20 ilaa 30 daqiiqadood ah si ay uga doodaan jawaabahoodii warqad-hawleedkii cinwaankeedu ahaa *maxay tahay derejada awooddaydu?*
4. Dib ugu qabo kooxo-yar-yarta kulan geba-gebo oo ay kaga doodaan layliga iyo wax-ku-oolnimadiis.

**DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU
SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED**

Arthur Ashe, oo ahaa aqoonyahankii Ciyaraha teniska oo dhintay muddo sannado aan sidaa usii fogeyn ah, wuxu yidhi:

***Si aad u kasbatid haybad weyn
Meesha aad Ajoogto ka bilaw
Isticmaal waxaad haysatid
Qabo wixii aad karayso***

Waa odhaah fudud oo wax badan ku tacalluqda awoodda qof. Waxaannu kuu soo jeedinaynaa inaad ku dhejiso gidaarka ka hor inta aanad bilaabin fadhigan.

LIFAAQA 1^{AAD}: ODDOROSKA ISTARATEJIYADAHADA DAD KASBASHADA SHAKHSI

Weydiimaalaha soo socda waxa loo sar-gooyey inuu kaa caawiyo oddoroska fahamka aad ka qabtid isticmaalka waqtigan iyo mustaqbalkaba siddeedda ilo-awoodeed si ay u korodho dad kasbashadaada marka aad ka shaqaynayso meelo ka baxsan xuduudaha ururkiinna.

Waxa dhici karta inaad u baahato inaad tixraacdo weedhihii gaabnaa ee ku saabsan sharaxa mid kasta oo ilo-awoodeedka ka mid ah in aad uga shaqayso oddoroskan si xaq ah. Waxay daba socotaa qalabka oddoroska waxaana la yidhaahdaa Tilmaanta Gaaban ee isticmaalka ilo-awoodeedka iyo Dad Kasbashada.

Weydiimaaluhu wuxu leeyahay laba khaanadood oo lagu qorayo isticmaalkaaga siddeedda ilo-awoodeed si ay u korodho fiditaanka dad kasbashada ee ururkiinna. Khaanad walba oo qoton ah waxa ku jira qiyaas ah 0 ilaa 100% si ay u sheegto heerka fahamkaaga ee isticmaalka waqtigan iyo mustaqbalka. Dhibicda 0 waxay la micne tahay weligaa ma isticmaashid il-awoodeedkan; 50% waxay sheegaysaa in aad isticmaashid laakiin aanu ahayn isticmaal wax-ku-ool ah; 100% in aanad dib dambe u isticmaali kari doonin hab wax-ku-ool ah. Istimaal boqolleyaasha ku guda jira ee u dhexeeya baraha cidhifyada si aad usii hagaajiso jawaabahaaga.

Khaanadda u horraysaa waxay ku weydiinaysaa inaad cabbirto isticmaalkaaga waqtigan xaadirka ah ee il-awoodeedkan si ay u korodho dad kasbashada iyo fiditaanka ururkiinna wixii ka baxsan xuduudihisa. Khaanadda labaad ee tirooyinku waxay ku weydiinaysaa inaad cabbirto isticmaalkaaga ugu badan il-awoodeedkan ee mustaqbalka. Marka aad oddorosayso isticmaalkaaga mustaqbal, ku xisaabtan in qaybta aan la isticmaalin ee il-awoodeedkani, waad ogtahaye in la adeegsan karo haddii aad si wax-ku-ool ah u maaraysay.

Dacalka fog ee midigta khaanadda u xigta waxa wax lagu qorayaa haddii il-awoodeedka aanu ku munaasib ahayn isticmaalkiisu doorarka iyo mas'uuliyadaha ururkiinna. Metelan, laga yaabaa in aanad lahayn adeeg gacan kuugu jira oo kuu suurto-geliya isticmaalka abaal-marin ama ku sandullayso kuwa iyagu dibadda uga baxsan xuduudaha maamulka ururkiinnu saameeyo.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

Isha Awoodda Iyo Dad Kasbashada	Isticmaalka Waqtigakan Min 0% ilaa 100%	Isticmaalka Mustaqbalka Min 0% ilaa 100%	Munaasib Ma Aha
1. Abaal-marin	0% 50% 100%	0% 50% 100%	
2. Amar-ku-taaglayn	0% 50% 100%	0% 50% 100%	
3. Sharciga	0% 50% 100%	0% 50% 100%	
4. Tix-raaca	0% 50% 100%	0% 50% 100%	
5. Khabiirnimada	0% 50% 100%	0% 50% 100%	
6. Macluumaadka	0% 50% 100%	0% 50% 100%	
7. Xidhiidh lahaanta	0% 50% 100%	0% 50% 100%	
8. Is-kaabka	0% 50% 100%	0% 50% 100%	

AMARRADA DHIBCAYNTA

Haddii la helayo dhammaan ilaha awoodaha oo u diyaar ah in la isticmaalo oo adiguna immika sida ugu sarraysa u isticmaalayso, dhibcahaagu waxay noqon karaan 100 qayb kastaba. Inteenna badan, dhibcaha 100ka ahee mid ka mid ah qaybahaasi noqoto waa wax u badan in aanay caqli-gal ahayn. Haddana, waaynu rumaysanahay in inteenna badani aanay wada isticmaalin qaar badan oo ilaheenna awoodda ah marka aynu ka shaqaynayno meelo dibadda ka ah ururradeenna.

Isu wada gee boqollaha dhibcaynahaaga fardi ahaaneed ee khaanad kasta oo qotonta una qaybi siddeed sida aad u heshid isku celceliska siddeedda dhibcaynood oo dhan. Haddii aanad wada dhibcayn siddeedda oo dhan oo ay kuugu wacan tahay iyada oo aanay laba ka mid ahi aanay u cuntamaynin doorarkiinna iyo mas'uuliyadihiinna, oo aad qaybiso tirada ilaha la dhibceeyey.

Iyada oo ku salaysan dhammaan ilaha awoodeed ee la dhibceeyey, isku celcelinta isticmaalkayga awoodda ee waqtigani waa boqolkiiba _____% .

Iyadoo qiimayntaa ku salaysan, isku celcelinta isticmaalkayga awoodda ee mustaqbalku waxay noqon doontaa Boqolkiiba _____% .

Farqiga u dhexeeya isticmaalkayga waqtigakan iyo qiyaasta ka mustaqbalka waa Boqolkiiba _____% .

Caqabadda I Hor-taal ee kor u qaadka awooddu waxay tahay: *Tilmaanta Hadaf lagu siyaadiyo isticmaalkaaga awoodda qaybahan kuwa ay ka dhex jiraan farqiyo muuqda oo u dhexeeya isticmaalka waqtigan iyo qiyaasta mustaqbalka.*

Iyada oo ku salaysan malayga ugu wanaagsan, waxaan rumaysanahay inaan ku kordhin karo isticmaalkayga gebi ahaaneed ee ilaha awoodeed Boqolkiiba _____ dhibcood muddo lix bilood gudahood ah.

Dib u eeg isticmaalkaaga ilaha awoodeed waqtigan iyo qiyaasta mustaqbalka ee mid kasta oo qaybaha ka mid ah. Go'aan ka qaado ilaha aad doonaysid inaad xoogga saarto ee kordhin doona awooddaada kasbashada shakhsiyaad iyo ururro ka tallawsan xuduudaha ururkiinna.

Mid kasta oo ah il awoodeed waxaan goostay inaan xoog dul saaro, waa kuwa dhammaan sababaha iigu wacan inaan u isticmaalin iyada intii karaanku gaadhayey ee aan rumaysanahay inay suurto-gal tahay.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

- Iyada oo ku salaysan sababaha kor lagu soo taxay, qorshahayga lixda bilood ee siyaadinta ilo-awoodeedka kala duduwan qiyaas isku celcelin ahboqolki i _____% waa sida soo socota:

Aad isugu koob arrimaha ku saabsan qorshaha aad ku fulinayso mid kastoo ka mid ah ilaha aad usoo tilmaantay inay sii hagaajin doonayso. Metel ahaan, waxaan ballan la dhigan doonaa Maayarka si aan ula socodsiiyo wararka barnaamijyada aan wadno iyo inaan ugu tabaruc ugu adeegno guddiyo kasta oo muwaadiniin ah meel kasta looga baahan yahay khibraddayda badbaadinta ubadka si xun loola dhaqmo.(Waxa jira awoodaha tixraac iyo khabiirnimo oo marka la isku daro u taagan nooc awood is-biirsi ah)

Si aan u xaqiijiyo in aanan isku hallaynin qorshahan, waxaa ku samayn doonaa waxyaabaha soo socda muddo saddex bilood ah, si aan u qiimeeyo raad-reebka hirgelinta qorshayga kordhinta awoodda ilaa waqtigaa. Si aan isu xusuusiyo sida ay muhiim u tahay dib u eegida kala badhka xilliga hirgelinta, ayaan xusuus qorkayga ugu calaamadsaday si aan u xusuusnaado.

LIFAAQA 2:

TILMAAN ADEEGSADAHAA EE ILAHA AWOODDA IYO KASBASHADA DAD

Waxyaalahan soo socdaa waa guud-marka kooban ee mid kasta oo ka mid ah ilo awoodeed iyo dad kasbashada ee ku taxan adeegga oddoroska. Waxa laga yaabaa inay kaa caawin karto marka aad mid kasta oo ilaha ah u tix-geliso naftaa qiimaynta.

- **Awoodda abaal-marinta:** Maareeye Urur Aan Xukuumi Ahayn ama urur bulsho-ku-sal-leh ahaan, waxad siin kartaa abaal-marin shaqaalahaaga ama dadka aad metesho metelan dallacaad, dhiirri-gelin, aqoonsi amaba inaad u siiso qalab iyo fursado.
- **Awoodda cadaadinta:** Isla martabadda hore adigoo haya, waxaad leedahay awood aad ku ciqaabto sida, inaad xanuunjiso, inaad casisho shaqaale, xataa in aad shaqada ka fadhiisiso iyo marka ay tahay dadka aad metesho inaad ka goyso maslaxado ay qabeen ama ka joojiso helidda badeecado iyo adeegyo.
- **Awoodda sharciga ah:** Tani waa mid ku dhisan martabaddaada hoggaamiye urur ahaan ee ku siisa xaqa aad culays ku saarto kuwa kale, ha ahaadaan shaqaale ama dadka ku egmaday ee aad wakiilka ka tahay
- **Awoodda Tixraaca:** Kuwani waa sifaalaha shakhsi iyo hay'ad ahaaneed ee qof ku xidhiidhiyo ixtiraamka iyo taabacsanaanta. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysani waxay awood ku yeeshaan inay samaystaan sumcadda ka timaaddaa awoodda tixraac ee ay kasbadaan inay sababtoodu tahay sumcadda wanaagsan ay ka yeesheen beesha dhexdeeda inay yihiin khayraad u qiime leh iyaga iyo weliba shaqada qaybta hawl-galkoodu ku aaddan yahay ee ay metelaan.
- **Awoodda Khabiirnimada:** Kani wuxu ka mid yahay ilo kasbashada dadka ee ugu waaweyn ee Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku sal-leh ku dhisan aqoontaada cilmi ee gaarka ah, Xirfadahaaga iyo waaya-aragnimadaada.
- **Awoodda Xogta:** Yaalaa waxa aad haysataa xog ama fursadda aad ku heshid xog ku saabsan beesha iyo mid ku saabsan kooxo gaar ah oo beesha dhexdeeda ah kuwaasoo muhiim u ah dadka kale.
- **Awoodda isku xidhanka:** Dad soo jiidashadu waxay yaalaa ku saabsan tahay cidda aad taqaanno in ka badan waxa aad taqaanno. Ururrada aan xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulshada ku salaysan waxay yaalaa joogaan marxalad ay doonayaan in lagu xidho shakhsiyaad iyo ururro sumcad kasbashada dadka leh oo muhiim ah.
- **Awoodda Is-kaabka:** Tani waa hibada sida la isugu darayo laba ama in ka badan oo ah ilaha awoodda kasbashada dadka, ee laga yaabo inaan midkoodna lahayn is-ahaantii haybaddii kasbashada dadka.

QALABKA 9^{AAD}: BADMAAXIDDA SAAXADDA SIYAASADDA

Hab-socodka siyaasaddu waxa la moodaa inu yahay jiid ay daneeyaan hoggaamiyeyaasha iyo hawl-wadeenada Ururro Aan Xukuumi Ahayn iyo Ururro-Bulsho-ku-Sal-leh fara-badan. Yaa dhab ahaantii dejiya siyaasadahan ay kala kulano dhibaatooyin aad u adag in laga dhex shaqeeyo? Sidee baa hab-socodka siyaasad-dejintu uga shaqeeyaa beeshayada? Ma jirtaa dariiqo nooc ay tahayba si uun loogu yeelan karo saamayn beddelaadda siyaasado amaba in wax lagu biirin karo siyaasado qabyo ah? Marka ay jiraan werwerro noocan oo kale ahi, qalabkan tababaridda ayaa loogu talo-galay inay ka bixiso aqoon dheeraad ah oo ka ballaadhan xirfad gacan-ka-qabasho ah.

Ujeedada Barasho: In la sii wado ka-qayb-galeyaasha aqoontooda ku saabsan sida siyaasadaha loo farsamo dhiso, loo go'aamiyo iyo sida loo dhaqan-geliyo.

Waqtiga loo baahan yahay: Ugu yaraan laba saacadood.

HAB-SOCODKA

1. Marka aad qorshaynayso aqoon-is-weydaarsigaaga, la sheekayso tiro ka mid ah kuwa aad isleedahay waxay noqon doonaan kasoo qayb-galeyaal, si aad uga barato wax badan oo ku saabsan hab-socodka siyaasadda. Iyada oo ku salaysan wixii aad ka baratay, la xidhiidh xafiiska maayarka ama karraaniga Golaha amaba si leeg sarkaal muhiim ah oo siyaasadda qaabbilsan oo u hawl-geli shakhsigaa ama xubin lagu kalsoon yahay oo hawl-wadeennada ka mid ah si uu kaaga caawiyo fadhigan. Uga war-bixi iyaga waxyaabaha cayiman ee aad khaas ahaan u doonayso inay ka hadlaan kuna digniin-sii inay la kulmi doonaan dhegeysteyaal su'aalo badan.
2. Ku fur fadhiga is-barasho ka dibna isticmaal geeddi-socodkii koox magacawga ama dood fikrado curin ah si loo dhaliyo liis wixii su'aalo ahee ay kasoo qayb-galeyaasha qabaan ee ku saabsan hab-socodka siyaasadda. U habee xogta qaybo heerar caqli-gal ah. Tani waxay tahay wax qofka kuu martida laga yaabo inuu doonayo si uu u fududeeyo fadhiga.
3. U raac tan qabashada dood haggan oo ku saabsan hab-socodka siyaasad-dejinta iyo hir-gelinta oo uu wadayo kuu martida ah ee af-hayeen-fududeeyaha ah.
4. Adigoo ku salaynaya socodkii iyo nuxurka fadhiga, waxaad weydiin kartaa kasoo qayb-galeyaasha inay tilmaamaan saddex ama afar masalooyin siyaaso ah oo gaar ahaan qaxar-badan u leh iyaga iyo hawl-gelinta barnaamijyadooda. Waxaad soo qabataa laba ama saddex kuwa ugu xiisaha badan oo samee kooxo hawleed yaryar ka sameeya war-bixin bayaan ah oo isu dheelli-tiran dhibaatada la xidhiidha siyaasadda ay tijaabinayaan. Metelan: Waa maxay dhibaatada runta ah ee ka aloosan siyaasadda? Yey saamayn ku yeelataa? Sidee bay iyaga u saamaysaa? Maxay yihiin cawaaqibiyada ka dhasha hir-gelinta siyaasadda aan doonayno in wax laga beddelaa? Maxay yihiin qaarkood

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

dariiqooyinka maraya ee siyaasaddaa lagu beddeli karaa? Sidee baynu u caawin karnaa si ay u noqoto wax ay aqbali karaan egmadeyaasheenna iyo ururradeennu?

5. Dib usoo shiri kooxo-hawleedkii si ay u war-bixiyaan iyo wixii kasoo noqda hadalladii ninka martida ah iyo xubnaha kale ee kooxda oo dhan. Haddii ay u muuqato inay habboon tahay, adigoo ku salaynaya heerarka hawl-gal iyo danaynta, waxaad ka dooni kartaa kooxda inay keenaan hal ama laba tallaabo hawleed ah oo sii hagaajin doona jawiga siyaasadeed ee ka dhex oogan dawladda hoose iyo Ururrada Aan Xukuumiga Ahayn iyo Ururrada Bulsho-ku-Sal-leh.

QALABKA 10: OLOLAYNTU WAA XIRFADDA DAD-KASBASHO

Ujeedada Barashada: Si loo kordhiyo aqoonta kasoo qayb-galeyaasha ee ku saabsan hab-socodka ololaynta.

Waqtiga loo baahan yahay: Ugu yaraan laba saacadood

HAB-SOCODKA

1. Isticmaalka layligani waxa dhici karta inuu u baahdo khabiir Ololeeye oo dibadeed si uu u macneeyo geddi-socodka sida ficil ahaan loogaga dhaqmo waddankiinna, maa daama ay ololayntu tahay wax u badan dhaqmaad degaan u khaas ah. fadhiga Ku bilaw dood jihaysan oo ku saabsan ololayntu inay tahay istaraatejiyad ay Ururrada Aan Xukuumiga ahayn iyo Ururrada Bulsho-ku-sal-lehi ay ku saameeyaan hab-socodka sharci-dejinta. Dooddani waa inay ku saabsanaataa xayndaabka sharciyeed ee uu ka dhex dhacaayo hab-socodka ololayntu, sida ololayntu ay u qabanayaan had iyo jeer waaxyaha kale ee bulshada iyo Ururrada Aan Xukuumiga ahayn iyo Kuwa Bulsho-ku-sal-lehi waxay ku dhex bislaanayaan hab-socodka.
2. Adiga oo ku salaynaya doodda, weydii ka-qayb-galeyaasha inay tilmaamaan dhawr masalooyin sharciyeed ah oo ay iyagu u danaynayaan oo ay kaga dheefi doonaan dedaal ololayn wax-ku-ool ah oo ay galaan. Ku qor liiskooda waraaqda weyn ka dibna weydii kooxda inay go'aan ka gaadhaan saddexda ugu muhimmad weyn Ururrada Aan Xukuumiga Ahayn iyo kuwa bulshada-ku-sal-leh ee waddanka ama gobolka ka jira.
3. Kooxda weyn u kala jebebi kooxo-yaryar hawleed oo 5 ilaa 7 qof ka kooban, oo koox yar kasta weydii inay qaataan mid ka mid ah qodobbada ugu mudnaansho sarreeya oo ay isu habeeyaan dedaal ololayneed ay u malaynayaan inu u noqon doono wax-ku-ool in sharciga la ansixiyo si masalada loo waajaho. Koox waliba waa (1) Inay luqad bayaan ah ku fasirtaa natiijada ay ka rabaan inay uga soo baxdo wax-qabad kasta oo sharciyeed oo masaladan ku saabsan. (2) Inay abuurto istaraatejiyad taageero loogu abaabulo mawqifka iyagu taagan yihiin. Iyo (3) Inay ogaadaan khayraadyada looga baahan yahay in la qaado hawl-gal ballaadhan oo lagu Ololaynaayo.
4. Dib-u-shiri kooxo-hawleedka si ay uga warbixiyaan waajibaadyada loogu cayimay tallaabada saddexaad oo weydii khabiirkaaga ololaynta inuu ka faallo ka bixiyo qorsheyaasha hawleedyada. Haddii ay noqoto wax habboon, dood kala wax-qabad kasta oo ay damcaan ka-qayb-galeyaashu inay u qabtaan koox ahaan si fadhiga loogu sameeyo daba-gal. Idinka oo xusuusan in ololayntu u dhacday sidii ugu wanaagsanayd sida dedaal iskaashi ku wada galeen hay'ado isku aragti ahi oo kale.

QALABKA 11: DABAGELIDDA IYO QIIMAYNTA FIDITAANKA URURKA

Ujeedada Barasho: Si aad loogu sii horumariyo fahamkaaga dedaalka ururkaagu ugu jiro fiditaanka.

Waqtiga loo baahan yahay: Qiyaastii ilaa hal saacad ah

HAB-SOCODKA

Layliga gaaban ee aad inyar ula saarantahay inaad la kulantid waxa loo naqshadeeyey inuu ka caawiyo maareeyayaasha iyo xubnaha guddiyada Ururrada aan Xukuumi Ahayn iyo Ururrada Bulsho-ku-salleyda inay daymo nidaamsan u lahaadaan dedaallada ay u galaan sidii ay ugu fidin lahaayeen dad kasbashadooda dibadda xuduudaha hay'adda. Sideedaa, waxa dhici karta inay noqoto wax aan tababareyaasha xiise badan u yeelan. Haddii ururkiinnu weyn yahay ilaa xad ay yeeshaan hawl-wadeenadu horjoogeyaal iyo mihnadleyaal, uga fikir iyada oo ay kugusoo biireen si ay kaagala qayb galaan hawl-galkan gaaban ee qiimaynta iyo qorshaynta. Adeeggan qiimayntu wuxu ka bilaabmayaa bog goonni ah, Haddii, laga yaabo inaad dooni lahayd inaad sawirato iyada sababo ah inaad dad u qaybiso iyo inaad isticmaasho awgeed.

LIFAAQA 1AAD: DEDAALKA FIDITAAN EE URURKIINNA BAADHITAAN DAYACTIR JOOGTO UGU SAMAYNAYSO

Su'aalaha so socdaa waxay ku salaysan tahay muhimmaddoodu dulucda qaybtii koowaad iyo qaybtii labaad ee buug-hawleedkan. Haddii, wax kastaba sababtu ha ahaatee, weydiimaha qaarkood uun aanay ahayn bayaan, waxa inaad u baahato dhici karta inaad dib ugu noqoto wixii lasoo maray intii ka horreysey dhacdadan xidhitaan.

Su'aalaha intooda badan waxaynu ku isticmaalaa qiyaas shan qodob ka kooban si ay kaaga caawiyaan inay qiimayso heerka guusha laga gaadhey. Dhibcaynta ah 1 waxay la micne tahay Sina Uguma aha wax-ku-ool sii wadidda ujeedada fiditaanka ururkayaga; Dhibcaynta saddex ah(3) waxay la micne tahay wax-ku-ool iska ah; iyo shan (5) oo la micne ah aad u wax-ku-ool ah. Ha iska indho tirin labooyinka iyo afarrada si dedaalka qiimaynahaagu u toosaan. Miyeynu bilawnaa?

1. Miyuu ururkiinnu leeyahay Qorshe war-is-gaadhsiineed qoran? Haa (). Maya(). Haddii ay jawaabtu tahay Haa, Sidee bay u tahay wax-ku-ool inay caawinayso Fiditaanka ururkiinna beesha dhexdeeda iyo meelaha ka baxsanba?

Sina uma aha wax-ku-ool 1 2 3 4 5 Aad wax-ku-ool u ah

2. Sidee baad u malaynaysaa inaad shakhsiyan wax-ku-ool ku tahay dhegeysiga baahiyaha, rabitaannada iyo fikradaha egmadeyaashiinna, saaxiibbadiinna iyo kuwayawga kale ee idiin muhiimka ah?

Sina uma aha wax-ku-ool 1 2 3 4 5 Aad wax-ku-ool u ah

3. Sidee bay wax-ku-ool u yihiin hawlaha fiditaanka ururkiinna inay muujiyaan baahiyaha, doonitaannada iyo fikradaha dheefsadeyaasha mudanka ah ee adeeggiinna iyo egmadeyaashiinna? Marka si kale loo dhigo sidee buu ururkiinnu wax-ku-ool ugu yahay dhegeysiga kuwaad u adeegtaan?

Sina uma aha wax-ku-ool 1 2 3 4 5 Aad wax-ku-ool u ah

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

4. Miyaad leedihiin xog habaysan oo xidhiidh dadweyne, kuna saabsan ururkiina oo aad siin kartaan dadka kale marka ay habboon tahay si aad dad isu bartaan ama doontaan inaad muujisaan cidda aad tihiin.

Sina uma aha wax-ku-ool 1 2 3 4 5 Aad wax-ku-ool u ah

5. Guud ahaan, sidee baad rumaysan tahay inuu wax-ku-ool u yahay dedaalka ururkiinnu marka uu la shaqaynaayo war-baahinta maxalliga ah sida, jaraa'idka, idaacadda, iyo maxaddadaha Tilifishanka?

Sina uma aha wax-ku-ool 1 2 3 4 5 Aad wax-ku-ool u ah

6. Sidee baad adigu u tahay wax-ku-ool shakhsi ahaan marka aad xidhiidh-shebekadaynta la samaynayo kuwoyawga kale beesha dhexdeeda iyo meelaha dibadda uga baxsan si aad u wadaagtaan ama isu weydaarsataan xog iyo fikrado, dariiqo si ah ama tu si kale ah, u kordhin doona wax-ku-oolnimadaada shakhsi ahaaneed amaba wax-ku-oolnimada kuwa kale ee aad la wadaagto hab-anshax amma himilooyin?

Sina uma aha wax-ku-ool 1 2 3 4 5 Aad wax-ku-ool u ah

7. Sidee bay u xor yihiin xubnaha ururkiinnu inay fikrado iyo xogo is-weydaarsadaan dadka kale ee ururkiinna dibadda uga baxsan?

Sina uma aha xor 1 2 3 4 5 Aad u xor ah

8. Miyuu ururkiinnu la leeyahay shuraakooyin shaqeeya oo rasmi ah kula jiraa ururro kale? Haa(); Maya() Hadday Haa tahay, sidee bay wax-ku-ool u yihiin, guud ahaantood?

Sina uma aha wax-ku-ool 1 2 3 4 5 Aad wax-ku-ool u ah

(Si aad u samaysid oddoros dhammays ah shuraakenimada ururro cayiman, waxaannu idinku casuumaynaa inaad adeegsatan Adeegga Tirsi 7 ee qaybtan buug-hawleedka.)

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

9. Sidee baad adigu shakhsi ahaan wax-ku-ool u tahay isticmaalka awooddaada iyo dad-kasbashadaadu (Aqoon, xirfado iyo waayo-aragnimo) aad ku horumarinayso hawlaha fiditaanka ururkiinna? Eeg Qalabka 8 haddii aanad hore sidaa u samaynin si uu kaaga caawiso inaad ka jawaabto weydiintan?

Sina uma aha wax-ku-ool

1 2 3 4 5

Aad wax-ku-ool u ah

10. Sideebuu ururkiinnu u yahay wax-ku-ool isticmaalka khayraadyada awooddiisa wadareed iyo dad kasbashadiisa wadareed si uu u helo hawluhu inay uga qabsoomaan beesha gudaheeda iyo dibadeedaba?

Sina uma aha wax-ku-ool

1 2 3 4 5

Aad wax-ku-ool u ah

11. Sidee buu wax-ku-ool u yahay ururkiinna wada shaqayntu la leeyahay dawladda hoose si uu u gaadho yoolalka iyo ujeedada barnaamijkiina?

Sina uma aha wax-ku-ool

1 2 3 4 5

Aad wax-ku-ool u ah

12. Sidee baad u tihiin wax-ku-ool adiga iyo ururkiinnu kasbasho inaad ku yeelataan siyaasadaha saamayn toos ah ku leh ururkiinna, egmadeyaashiina iyo dadka dheefsada adeeggiinna?

Sina uma aha wax-ku-ool

1 2 3 4 5

Aad wax-ku-ool u ah

13. Sidee baad wax-ku-ool u tihiin adiga iyo ururkiinnu wada shaqaynta aad la leedihiin ururrada isku aragtida tihiin si aad saamayn ugu yeelataan sharciyada idin ku yeelan doona ama wagtiganba idinku leh raad-reeb habka aad idinka iyo kuwo kale aad u hawl-gashaan si aad ugu adeegtaan egmadeyaashiinna?

Sina uma aha wax-ku-ool

1 2 3 4 5

Aad wax-ku-ool u ah

14. Miyuu ururkiinnu ka hawl-galaa dedaallo ololayn ah oo la gashaan sharci-dejintiinna maxalliga ah ama sharci-dejinta qaranka? Haddii ay sidaa tahay, sidee baad u malaynaysaa inay wax-ku-ool u yihiin dedaalladaasi si aad u gaadhaan himilooyinkiinna?

Sina uma aha wax-ku-ool

1 2 3 4 5

Aad wax-ku-ool u ah

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

15. Iyada oo ku salaysan oddoroskan aan rasmi ahayn, sidee baad run ahaantii u malaynaysaa inay wax-ku-ool u yihiin dedaallada fiditaanka ururkiinna?

Sina uma aha wax-ku-ool

1 2 3 4 5

Aad wax-ku-ool u ah

Si aad u ogaatid in guud ahaan qiimaynta weydiintii ugu dambeysey inay yoolka ku taagan tahay, waxaan kuu soo jeedinaynaa inaad xisaabiso dhibcayn isku-celcelin dhex u ah su'aalihii aad kusoo qiimaysay qiyaasaha 1 ilaa 5 oo dhan. Isku wada gee dhibcaha gaar gaarka ah una qaybi tirada inta goor ee aad isticmaashay qalabka dhibcaynta.

Isku celceliska dhibcayntaydu waa _____ .

MIN QIIMAYNTA ILAA QORSHAYNTA IYO HIR-GELINHA FIDITAANKA

Si aanay idiinka khasaarin macluumaadkan fiicani, waxaannu idiin soo jeedinaynaa inaad isku shuqlisaan in yar oo qorshayn hore ugu tallaabsataan.

Dib u jeedaali mid kasta oo dhibcaynteedu hoosaysey, xaaladahaasna halka aad u malaynayso inay dantaada ugu fiican ku jirto ee aad ku horumarinayso ku dhaqanka ururkiinnu ee istaraatejiyad kasta oo fidineed, sida uu isugu dubba-ridayo qorshe hawleed uu kaga jawaab celinayo. Mid kasta oo ah hawl-qabad cayiman oo qabyo ah, waxaan idiin soo jeedinaynaa inaad adeegsataan waxyaabaha soo socda.

Tallaabada ugu horraysa hab-socodka waa inaad nafihiinna weydiisaan sababtii aad ugu noqon weydeen wax-ku-ool isticmaalka istaraatejiyad-fidineed cayiman. Hadba inta ay badan leeg-tahay sugnaantaada *Waayada*, ayuu u fududaanayaa waajibaadkaaga qorshayneed. Qaado waqti yar oo aad kaga fikirto wax ku saabsan dhammaan su'aalihii "*Waayada*" muhiimka ah dabeedna halkan hoose ku diiwaan-gelin go'aanno wixii aad kala soo baxday oo kooban.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

1. Istaraatejiyada fidineed ee aannu qaadanayno ama hagaajinaynaa waa:

2. Sababaha aannu sidan u yeelaynaa waa:

- ---
- ---

3. Ujeedadayada guud waa in aannu:

4. Isla ujeedada duleed waxaannu ka doonaynaa inaanu ka gaadhno ujeeddooyinka cayiman ee so socda:

- ---
- ---

Mid kasta oo ah himilo hawl-gal ah, isugu dubba-rid qorshe hawleed, waxa ku jirta:

1. Ujeedada la tiigsanayo in la gaadho

2. Qofka leh awoodda iyo mas'uuliyadda ugu horraysa in ujeedadaas la gaadhaa, waxa

weeye

3. Kuwa kale ee loo baahan yahay in lagu daraa waxay kala yihiin:

- ---
- ---
- ---

4. Si ujeedadaa loo gaadho, shaqooyinka soo socda ayaa u baahan in la fuliyo:

- _____
- _____
- _____

5. Waajibaad kasta, waa inaad heshaa muddada waqti ee ay fulinteedu u baahan tahay iyo inta ay dherer leegtahay ee ay qaadanayso in lagu qabto.

- Waxa fuliyey _____
- Qaadanaysa wax aan ka badnayn _____ Qof-maalmood
(Waxad u baahan doontaa shaxo qorshayn-hawleed dheeraad ah waajibaad walba)

6. Khayraadyada kale ee aad ugu baahan doontaan fulinta waajibaadkan wax ka mid ah

- _____
- _____
- _____
- _____
- _____

7. Istaraatijiyadayada aanu ku daba-gelayno socodka hawlaha ee ku quman himilo gaadhka iyo cabbiraadda raad-reebka hir-gelinteeda waxa ku jiri doona waxa soo socda:

Hambalyo! Waxaa u qaaddeen taallaabo weyn dhinaca sii ballaadhinta fiditaanka iyo dad kasbashada ururkiinna. Waxaannu idiinka rajaynaynaa guul badan inaad ka gaadhaan hawl-galladiinna ka baxsan xuduudaha ururkiinna.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

GLOSSARY	
ENGLISH	SOMALI
1. Accountability	- Xisaabtan
	- Xilkaa Saaran yahay
2. Action plan	- Qorshe hawleed
	- Wax-qabad hawleed
3. Active Listening	- Dhegaysi feejigan
	- Dhegaysi Darban
	- Dhegaysi Mug leh
4. Alternative	- Kala Doorasho
	- Wax bedeli kara wax kale
5. Application	- Arji
	- Codsii
	- Adeegsi
6. Assessment	- Qiyaasid
	- Qiimayn
7. Authority	- Suldada
	- Awood xukun
8. Awareness	- Wacyi-galin
	- Ka war qab
9. Basic Education	- Wax-barasho Asaasi ah.
10. Beneficiary	- Dan ku Qabe
	- Ka faa'iidayste
11. Capacity Building	- Kobcin wax Qabad
	- Awood dhisid
12. Case Study	- Daraasad Xaaladeed
13. Check list	- Liis Hubineed
14. Civic	- Madani
	- La xiriira magaalo
	- Muwaadin
15. Collaboration	- Gacan siin
	- Wada shaqayn
	- Is Caawimid
16. Committee	- Guddi
17. Communicator	- Gaarsiye
	- Isgaadhsiiye
18. Community	- Beel
	- Jaaliyad

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

19. Community Development	- Horumarin Beeleed - Horumarin Jaaliyadeed
20. Concepts	- Figrado - Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	- Figrada Metalaada Xilaalka
22. Conflict	- Is-qabad/Khilaaf - Iska hor imaad
23. Consensus	- Rayi la isku raacay - Aqbalaad figrad guud
24. Consequently	- Natiijo - Cawaaqib
25. Constituency	- Dagaan Doorasho
26. Co-operation	- Iskaashi - Wada shaqayn
27. Council	- Gole
28. Councillor	- Xil-dhibaan Degaan - Xubin ka tirsan Gudiga degaanka
29. Counter productive	- Maax Dumin - Lid ku ah
30. Criteria	- Cabirka wax lagu saleeyo - Qoddobbo wax lagu saleeyo
31. Critique	- Wax lagu Saleeyo
32. Decision Maker	- Goa'aamiye
33. Definition	- Qeexid
34. Delegation/Delegate	- Wefti - Ergo
35. Democracy	- Demoqraadiyad
36. Description	- Tilmaan - Sifo - Sharax
37. Dialogue	- Wada Hadal
38. Effective	- Wax ku ool - Sidii la rabay wax u tarid
39. Effective leadership	- Hogaaminta wax ku oolka ah
40. Efficiency	- Wax qabad fiican leh
41. Elected Leadership	- Hogaaminta la doortay
42. Empower/Empowerment	- Awood siin - Awood u fasaxid

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

43. Enabler/Enable	- Awood siin - Karti siin
44. Essay	- Qormo - Maqaal
45. Ethical	- Hab-dhaqan
46. Evaluation/Evaluate	- Qiimayn
47. Evaluation Survey	- Qiimayn Sahan - Baaritaan qiimayneed
48. Exercise	- Layli
49. Facilitator	- Fududeeye/Sahle
50. Feed back	- War Celin - Jawaab Celin
51. Financier	- Masuul Maaliyadeed.
52. Gender	- Jandar
53. Goal	- Hadaf - Gool
54. Good Governance	- Hab Xukun Wanaagsan - Hab Maamul
55. Government	- Xukuumad
56. Group Discussion	- Dood kooxeed
57. Guide	- Tilmaamid - Hage
58. Hand Book	- Tilmaan Bixiye - Tilmaame Bare
59. Human Resources	- Khayraadka Dadka
60. Human Settlement	- Degsiimooyinka Aadanaha - Degaamayn
61. Implementation	- Hirgalin - Fulin
62. Information	- Xog - Wargelin
63. Institution	- Haya'ad
64. Institution Builder	- Haya'ad Dhise
65. Institutionalise	- Haya'deeye
66. Instruction	- Amar - Wax barasho - Wax barid
67. Key Point	- Qoddobbo Muhiim ah.

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

	- Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68. Leadership Process	- Geedi socod Hoggaamineed
69. Learning	- Barasho
	- Wax Barasho
	- Tacliin Barasho
70. Learning Objective	- Ujeeddooyinka Barashada
	- Yoolka Barashada
71. Local Government/Authority	- Dawladda Hoose
72. Majority	- Aqlabiyad
	- Inta Badan
73. Management Process	- Geedi Socodka Maaraynta
74. Meeting	- Kulan
	- Shir
75. Minority	- Inta Yar
	- Laga tiro yar yahay
76. Minutes	- Hadal Qor
	- Hadal qoraal
77. Mission	- Ergo
	- Risaalo
78. Monitoring	- La socod
	- La saan qaad
79. Negotiation/Negotiator	- Wada Xaajood siiye
	- Wada Hadal siiye
	- Gorgoriye
80. Networking	- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81. Organization	- Urur
82. Overseer	- Korjooge
83. Overview	- Dulmar/Guud Mar
84. Participants	- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha
85. Perception	- Faham/Dhugmo/Garasho
86. Performance	- Waxqabad/Fulin Hawleed
87. Perspective	- Ka eegid wajio kala duwan
88. Policy	- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad
89. Policy Maker	- Siyaasad Dejiye
90. Power Broker	- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade
91. Presentation	- Soo Bandhigid/Qadimaad
92. Proactive	- Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac
93. Process	- Geedi socod/Socodka
94. Questionnaire	- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

	ah/weydiimo Sahan ah
95. Quorum	- Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo
96. Rational	- Maan-gal/Macquul
97. Reactive	- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug
98. Reference	- Tixraac/Raad raac
99. Reflection	- Ilays noqod/Humaag noqod
100. Resources	- Khayraad
101. Revenue	- Dakhli
102. Role play	- Door-jelid/Door ciyaarid
103. Session	- Fadhi/Kulan
104. Shared Vision	- Aragti wadaag
105. Simple Majority	- Aqlabiyad hal dheeri ah
106. Simulation	- Iska yeelid/U ekeysiiin
107. Slums	- Buul caws/Carshaan/Isku raran
108. Solution	- Furdaamin/Xal
109. Stakeholders	- Daneeyayaal
110. Strategic Plan	- Qorshe istaratijiyadeed
111. Strategy	- Istaratijiyad/Tab/xeelad
112. Summary	- Soo koobid/Khulaaso
113. Symptoms	- Astaamo/ Calaamado
114. Systematic	- Habaysan/Nidaamsan
115. Technique	- Farsamo/Xeelad
116. Training Design	- Jaanjooyada Tababarka/Naqshadeynta Tababarka
117. Training Material	- Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka
118. Training Need Assessment	- Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka
119. Transparency	- Wax qaris laa'aan
120. Transparent	- Qof aan waxba qarinnaynin.
121. Unanimous	- Loo dhan yahay/Gedigood
122. Vision	- Aragti fog/Aragti dheer
123. Warm up exercise	- Iskulalayn/Qandhicin/Diiran
124. Workshop	- Aqoon Isweydaarsi
Priority two words	
125. Acknowledgment	- Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin
126. Administrative Fixes	- Adeegsi
127. Analysis	- Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil
128. Assignment	- Shaqo Mucayin ah
129. Assumption	- Maleyn/Si u qaadasho
130. Benchmark	- Bar qiyaaseed/Bartilmameed
131. Challenges	- Caqabad/Loolan/Hardan

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

132. Collective	- Kooxeed/Urureed/Wadareed
133. Conceptual frame work	- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik
134. Constructive	- Wax dhisid/Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	- Xikmad soo jireen ah
136. Corruption	- Musuq-maasuq/Laaluush.
137. Dilemma	- Laba daran mid dooro
138. Diversity	- Kala duwanaan/Kala gedisnaan
139. Encouraging	- Dhiiri-galin/Geesinimo galin
140. Fundamental	- Asal/Aasaasi
141. Identification	- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi
142. Individual Contribution.	- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri
143. Infrastructure	- Dhismo-hooseed.
144. Input	- Wax galin
145. <i>Insight.</i>	- Aragti Maskaxeed
146. Inspiration	- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid
147. Interaction	- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid
148. Judgement	- Xukun/Go'aan
149. Land Use Malaise	- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- Ujeeddo badan/Ujeedooyin kala du
151. Output	- Wax ka soo saarid
152. Potential Candidate	- Musharax dihin/Musharax iman kara
153. Pre-training	- Tababar horaad/Tababar hortiis
154. Priority	- Mudnaan
155. Problem Solver	- Furdaamiye/Xaliye dhib
156. Proficiency	- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh
157. Public	- Guud
158. Public Sector	- Qaybta Guud
159. Public Service	- Adeeg guud
160. Regulation	- Xeer Hoosaad
161. Self Governance	- Isxukumid
162. Self Introduction	- Is-sheegid/Is-tilmaamid
163. Self study	- Isbarid
164. Self Assessment	- Isqiyaasid/Isqiimeyn
165. Shrinking Resources	- Khayraadka sii yaranaya
166. Technical	- Farsamo/Farsamayn
167. Training needs	- Baahi tababar
Priority three Words	
168. Absolute Poverty	- Saboolnimo
169. Absolute	- Gebi-ahaan/Buuxda
170. Application Commitments	- Nidar-gal/Daba-qaad ballan

DHISIDDA AWOODDA URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA BULSHADA OO KU SALAYSAN FIDITAANKA URUR AHAANEED

171. Bureaucracies	- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172. Caution	- Taxadar/Digniin
173. Density	- Cufnaan/Jirmiga shega
174. Environmental Degradation	- Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka
175. Equilibrium	- Dheeli-tir/Is-le'eg
176. Hawker	- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya
177. Implication	- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka
178. Jurisdiction.	- Haya'addaha Garsoorka
179. Legal Requirement.	- Baahida Sharciyeed
180. Legislation	- Xeer Degin
181. Legitimate	- Sharci ahaan/Qaanuun ahaan
182. Matchmaker	- Isku aadiye wax isku habboon
183. Misinterpretation	- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan
184. Off-spring	- Farac
185. Optimistic	- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg
186. Partnership	- Wadaag/Wada lahaansho
187. Pessimistic	- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188. Phenomena	- Ifafaalayaal
189. Professional	- Xirfadle/Xeel-dheeri
190. Recycle	- Sameyn celin/Dib u nacfi galin
191. Rules	- Qawaaniin/Xeer
192. Status Quo	- Xaalad taagan
193. Stimulation	- Xiiso galin/Fi-fircooni galin
194. To Wear Different Hats	- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa
195. Water Pollution	- Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196. Facilitator	- Fududeeye
197. Financier	- Masuul Maaliyadeed
198. Gender	- Jandar
199. Negotiator	- Wada hadal siiye
200. Overseer	- Korjooge
201. Policy Maker	- Siyaasad dejiye
202. Power Broker	- Awood wax ku Qabte
203. Institution Builder	- Haya'ad dhise
204. Leader	- Hogaamiye
205. Leadership	- Hogaamin

**UN-HABITAT
TRAINING AND CAPACITY BUILDING BRANCH (TCBB)
AND REGIONAL OFFICE FOR AFRICA AND THE ARAB STATES
(ROAAS)**

P.O.Box 30030 GPO Nairobi 00100, Kenya
Telephone: 254-20-623120; Fax: 254-20-624266/7
E-mail: infohabitat@unhabitat.org; Website: <http://www.unhabitat.org>

EUROPEAN COMMISSION